

MAANSADA MASIIXA

Anthology of Somali
Christian Poetry

Aweis A. Ali
Series Editor



MAANSADA MASIIXA

Anthology of
Somali Christian Poetry

Volume 1

Aweis A. Ali
Series Editor



Maandeeq Publishing

Published by
Maandeeq Publishing
Nairobi, Kenya.

First Edition, 2020



This license lets you distribute, remix, tweak, and build upon this work,
even commercially, as long as you credit Aweis A. Ali for the original creation.

Aayadaha Kitaabka Quduuska ah waxaa laga soo qaatay
Kitaabka Quduuska Ah © Society for International Ministries, 2008

ISBN: 978-9914-700-43-5

The series editor can be reached at:
amazingwisdom@gmail.com

TUSMADA BUUGGA

DEDICATION.....	vii
HORDHAC	1
KITAABKA QUDUUSKA AH IYO MAANSADA	2
AXMED KALE ALLOW KEEN.....	5
SHUHADADA.....	7
IDILKIINBA ADDEECA.....	15
USHA KAALAY NOO QABO	16
INAAD TAWBADKEENTO	17
QIRASHO.....	18
ILAAH BAA MAHAD ISKA LEH	19
SIDEE BAAD ILAAHAY.....	20
INAAN NAHAY KUWAAGII	21
BOQORKII DUNIDEENNA	24
GOORTUU BIGILKU UU DHACO	25
WAA BISHAARADEENNEE	26
BOQORKII BOQORRADA	27
DARTEEN KII LOO JARIBAY.....	30
JACAYL WAA KANE U KAALAY	31
MASIIXA U JEELLANOW	32
HADDAAD JECESHAHAY ILAAH	33
XOG WARRAN	35
XEROW XUSUUS MUDAN	37
XAMDIYO FARXAD.....	41
NABAD.....	43
XAYLAA KA DIGAY	45
IGA DADAB ALLAHAYOW	48
RABBOW KUMA DAFIRAYO.....	49

KAN II DUDAYA YEELKII	50
DARIIQII BADBAADSHAHA	51
DAFIRAADDA CIISE	52
DAB IYO DHAMAC LAYGU SHIDO	53
LAABTIINNAN DURUGTAY	54
RUUXA QUDUUSKA AH	57
RUUXNA YUU LUMIN	58
RABOW NAXARIIS U FIDI	59
SAYIDKEENNA WANAAGSAN	61
SILIC WAYN	63
JACAYL AAN SALGUURAYN.....	64
XAQA WAYNU SII HURIN.....	65
SAACADI MA LAABNEE	66
SHAAFICI.....	68
SOO DHAWAADA.....	71
HALELUUYA WADA DHAHA	72
U ADKAYSTA DHAAWACA	74
XAYLAA CADDEEYAY	77
CODKA NOLOSHA CUSUBOW	79
JACAYL CIISAAN QABAA	82
SIDA CULAYGA OO KALE	83
GUHAAD	86
AXMED XAYLE GEERIDA KU TIMID.....	88
GAALLIN INAY TAHAY SHABAAB	91
GACMAHAAGA NOO FIDI	96
FAAFIYA INJIILKA	99
QAADIROW ILAAH.....	102
QIYAAMUHU WUU DHOW YAHAY	103
ALLOW INTA AAN QABRIGA	104

NAGA QABO IBLAYSKA	105
MASIIXII MAANKU RAACAY	108
MAHADDA SIIYA	109
MAALINTA ADAGEE XISAABTA	110
MASIIXIYADDA SOO RAAC	112
MURTIDA WAXAN UGA SOCDA	113
MAHADDANA WAXAA LEH	114
WAADIGA KHAYRKA	117
XERTII MASIIXA	118
NA HOGGAAMI EEBBOW'	121
HALELUUYAH	122
HILINKII NOLOSHA	123
GUNAANAD	125
ABOUT THE SERIES EDITOR	126



WHAT OTHERS SAID ABOUT THIS BOOK

Maansada Masiixa ranks among the best literature the Somali Church has ever produced. I foresee many Somalis memorizing the Christian poetry contained in this book and reciting it for generations. The contributors to this book are among the best poets in the Somali Church.

Hussein Guureh Mohammed
Evangelist, North-East Kenya

This is a great book and next only to the Holy Bible in importance! The global Somali Church has never produced work this splendid. This Christian poetry book is simply priceless!

Abdisalaam Ali Daahir
Evangelist and Bible Translator
Shewa Region, Ethiopia

The Christian poetry in this book is impressive. This work has been published the right time because the Somali Church is experiencing significant numerical growth and this book will help with the discipleship and the spiritual growth of the community of faith. I am recommending to every Somali Christian to read and enjoy this masterpiece.

Nuur Diini
Evangelist, Abuur Cusub Ministry
Nairobi, Kenya

This book is written in a superb Somali lyrical style; this profound spiritual work enlightens the soul of the Somali believer and stirs up the mind of the Somali seeker with a feast of songlike Gospel wisdom presented in classical Somali poetry.

Quule M. Egal
Somali Christian Elder
Ontario, Canada

The British explorer, Richard Francis Burton, described the Somalis as a “nation of poets.” We praise the Lord for the fact that Somali Christians have united to use their poetic gifts for the Glory of God. The poems in this book are relevant in facilitating the Great Commission and in nurturing the souls of the disciples of Christ.

Abdi Du’ale
Social Media Minister
Horn of Africa



DEDICATION

This book is dedicated to the late Eng. Abdulkadir
Mursal, an eminent hymnologist and a faithful
disciple of Christ.

TUSMADA BUUGGA

1. Hordhac
2. Kitaabka Quduuska Ah iyo maansada
3. Axmed kale Allow keen
Faysal Xasan Jaamac
4. Shuhadada
Aweis A. Ali
5. Idilkiinba addeeca
Bashiir Muuse
6. Usha kaalay noo qabo
C. A. Axmed
7. Inaad tawbadkeento
C. A. Axmed
8. Qirasho
C. A. Axmed
9. Ilaah baa mahad iska leh
C. A. Axmed
10. Sidee baad Ilaahay
C. A. Axmed
11. Inaan nahay kuwaagii
C. A. Axmed
12. Boqorkii dunideenna
Bashiir Muuse
13. Goortuu bigilku uu dhaco
C. A. Axmed
14. Waa bishaaradeennee
C. A. Axmed
15. Boqorkii boqorrada
C. A. Axmed
16. Darteen kii loo jaribay
Y. B. Xirsi
17. Jacayl waa kane u kaalay
C. A. Axmed
18. Masiixa u jeellanow
C. A. Axmed
19. Haddaad jeceshahay Ilaah
C. A. Axmed
20. Xog warran
Aweis A. Ali
21. Xerow xusuus mudan
Maxamed Gurxan
22. Xamdiyo farxad
Y. B. Xirsi
23. Nabad
Aweis A. Ali
24. Xaylaa ka digay
Aweis A. Ali
25. Iga dadab Allahayow
C. A. Axmed
26. Rabbow kuma dafirayow
C. A. Axmed
27. Kan ii dudaya yeelkii
C. A. Axmed
28. Dariiqii badbaadshaha
C. A. Axmed
29. Dafiraadda Ciise
C. A. Axmed
30. Dab iyo dhamac laygu shido
C. A. Axmed
31. Laabtiinnan durugtay
C. A. Axmed
32. Ruuxa Quduuska ah
C. A. Axmed
33. Ruuxna yuu lumin
C. A. Axmed



34. Rabbow naxariis u fidi
C. A. Axmed
35. Sayidkeenna wanaagsan
Bashiir Muuse
36. Silic wayn
C. A. Axmed
37. Jacayl aan salguurayn
C. A. Axmed
38. Xaqa waynu sii hurin
C. A. Axmed
39. Saacadi ma laabnee
C. A. Axmed
40. Shaafici
Y. B. Xirsi
41. Soo dhawaada
Y. B. Xirsi
42. Haleluuya wada dhaha
C. A. Axmed
43. U adkaysta dhaawaca
C. A. Axmed
44. Xaylaa caddeeyay
Aweis A. Ali
45. Codka Nolosha Cusubow
Aweis A. Ali
46. Jacayl Ciisaan qabaa
Y. B. Xirsi
47. Sida culayga oo kale
C. A. Axmed
48. Guhaad
Aweis A. Ali
49. Axmed Xayle geerida ku timid
Aweis A. Ali
50. Gaallin inay tahay Shabaab
Maxamed Gurxan
51. Gacmahaaga noo fidi
C. A. Axmed
52. Faafiya Injiilka
Paul Faarax Khaliif & Aweis A. Ali
53. Qaadirow Ilaah
Y. B. Xirsi
54. Qiyaamuhu wuu dhow yahay
C. A. Axmed
55. Allow inta aan qabriga
C. A. Axmed
56. Naga qabo iblayska
C. A. Axmed
57. Masiixii maanku raacay
Y. B. Xirsi
58. Mahadda siiya
Y. B. Xirsi
59. Maalinta adagee xisaabta
C. A. Axmed
60. Masiixiyadda soo raac
C. A. Axmed
61. Murtida waxan uga socdaa
C. A. Axmed
62. Mahaddana waxaa leh
C. A. Axmed
63. Waadiga khayrka
C. A. Axmed
64. Xertii Masiixa
C. A. Axmed
65. Na hoggaami Eebbow
C. A. Axmed
66. Haleluuyah
C. A. Axmed
67. Hilinkii nolosha
C. A. Axmed
68. Gunaanad



HORDHAC

In aan sugaanleyda Soomaaliyeed ee Masiixiyiinta ah ka ururiyo maansooyin dhaxal u noqda Kiniisadda Soomaaliyeed ayaa igu dhalatay sanado ka hor. Waxaa fikirkaa quman igu soo dhacay kadib markii aan arkay Masiixiyiin Soomaaliyeed oo dusha ka tirinaya maansooyin xigmad badan oo xul ah. Maansoolaydaasi waxay tirinayeen dhib la'aan suugaan isugu jirta jacayl, madadaalo, qasiidooyin iyo qaar kale oo badan. Waxaa ii muuqatay in haddii aanan anigu is xilqaamin oo aan inta guntiga dhiisha isaga dhigo aan Masiixiyiintaas ka reebin xigmadaha Eebbe hibada u siiyay in ay daadka iyo dabaysha raaci karaan murtidaasi oo ay ka qatanaan doonaan jilalka soo socda ee Masiixiyiinta ah iyo Soomaalida kale ee Muslimka ah ee ka fii'iadaysan kari lahaa murtidan.

Waxaan la xiriiray dhowr qof oo aan ku tebayay suugaan badan waxayna buuggan ku darsadeen maansada dhex ceegaagta oo u badan qasiidooyin Ilaah amaan ah iyo suugaan kale oo meelo kala duwan taabanaya. Anigu waxaan ku darsaday buuggan dhowr maanso oo xambaarsan magacayga waxaanan ahay soo ururiyaha maansada iyo isku duwaha buuggan. Waxay ii tahay farxad aan la sahalsan karin in uu miro dhalay dadaalkaygii dheeraa ee aan ku rabay soo bixitaanka buuggan. Maanta waxay Kiniisadda Soomaaliyeed ee caalamiga ahi leedahay qaamuus ay ku urursan yihiin suugaan qaybo kala duwan ah. Buuggani waa midkii ugu horeeyay ee caynkiisa ah ee abid ay iska kaashadaan Masiixiyiin Soomaaliyeed. Waxaan aaminsanahay in buuggani uu yahay billow balse uusan ahayn dhammaad.

Buuggani waa uun qaybtii 1aad oo waxaa jiri doona qaybo badan oo kale oo kadaba iman doona haddii Eebbe idmo. Waxaana si gaar ah iyo si guudba ugu mahadnaqayaa maansoolayda Soomaaliyeed ee Masiixiyiinta ah ee kala jooga dalka iyo dibaddaba ee buuggan ku darsaday suugaantooda ay maskaxdooda ka soo shiileen. Walaalahaas Soomaaliyeed ee ah Xerta Sayid Ciise Masiix way wada mahadsan yihiin waxaanan ku leeyahay Eebbe ha idinka siiyo ajar iyo xasanaad suugaanta aad hadiyadda uga dhigteen Kiniisadda Soomaaliyeed ee caalamiga ah. Waxaan ku boorrinayaa xerta Sayid Ciise Masiix ee hibada u leh maansooyinka in ay ka qayb qaataan buugaagta suugaaneed ee buuggan ka dambeeya oo si joogta ah u soo bixi doona.

Haddii aad tahay Masiixi Soomaaliyeed oo doonaya in uu suugaan ku darsado buugaagta soo socota, fadlan igala soo xiriir e-mail-ka ah amazingwisdom@gmail.com

Nabad iyo Caano

Aweis A. Ali

KITAABKA QUDUUSKA AH IYO MAANSADA

*Rabbiga gabay cusub ugu gabya,
Dadka dhulka oo dhammow, Rabbiga u gabya.
Rabbiga u gabya, oo magiciisa ammaana,
Oo badbaadintiisana muujiya maalin ka maalin.
Ammaantiisa quruumaha dhexdooda ka sheega,
Oo shuqulkiisa yaabka badanna dadyowga oo dhan ka
dhex sheega.*

Sabuur 96:1-3

*Rabbiga gabay cusub ugu gabya,
Waayo, isagu wuxuu sameeyey waxyaalo yaab badan,
Gacantiisa midig iyo dhudhunkiisa quduuska ahuna
waxay keeneen badbaado.
Rabbigu wuxuu dadka ogeysiyeey badbaadadiisii,
Oo xaqnimadiisiina wuxuu bayaan ugu muujiyey
quruumaha hortooda.
Oo wuxuu soo xusuustay naxariistiisii iyo
aaminnimadiisii uu u qabay reerka binu Israa'iil,
Dadka dhulka darfihiisa jooga oo dhammu way wada
arkeen badbaadinta Ilaaheenna.
Inta dhulka joogta oo dhammay, Rabbiga farxad ugu
qayliya,
Dhawaaqa, oo farxad ku gabya, oo ammaan ku gabya.
Rabbiga ammaan ugu gabya idinkoo kataarad haysta,
Kataarad iyo codka heeska ugu gabya.
Boqorka Rabbiga ah hortiisa farxad kaga dhawaajiya
Turumbooyin iyo buunan.
Badda iyo waxa ka buuxaaba ha guuxeen,
Dunida iyo kuwa dhex deggan oo dhammuna ha
dhawaaqeen,*



*Webiyadu ha sacbiyeen,
Oo buuruhuma dhammaantood farxad ha kaga gabyeen
Rabbiga hortiisa,
Waayo, isagu wuxuu u imanayaa inuu dhulka xukumo,
Wuxuu dunida ku xukumi doonaa xaqnimo,
Dadyowgana caddaalad.*

Sabuur 98:1-9

*...laakiinse Ruuxu ha idinka buuxsamo. Iskula hadla
sabuurro iyo heeso ammaan ah iyo gabayo xagga ruuxa,
idinkoo gabyaya oo Rabbiga qalbigiinna ka ammaanaya.*

Efesos 5:18b-19







AXMED KALE ALLOW KEEN

Faysal Xasan Jaamac

Dad allow ogaada
Adhaxdaan u liitaa
Afka yaa i awdan
Aarankaa dur duriyee
Anigoo ildaran baan
Joogaa Itoobiya

Alla yaabkan nagu dhacay
Allaylkii markay tahay
Arrin ban la taahaa
Miyaan kuu imaadaa
Axmedow¹ walaalow

Addis baan ku raagee
Agagaarka laabtaad
Axmedew ku taalaa
Ku amaani maayee
Arrinkan an leeyahay
In uu dhab iga yahay
Aadmigoo dhan baa garan

Anna daacadnimadii
Waan yara asqaysnoo
Abaar baan dareemaa
Abaal badan inoo gashay
Abid aanan gudi karin
Balse adi xusuustaa
Uurkay nooga taalaa

1 Professor Axmed Cali Xayle (1953-2011) wuxuu ahaa Masixi, aqoon yahan, nabaddoon, aftahan iyo deeqsi aan agtiisa lagu qadin.



Addis dactaladeedaan
 Ubax kuugu beeree
 Alfa iyo Omegaha²
 Aad agtiisa joogtaa
 Arrinkayga garanoo
 Araxdaan ka jabanahay
 Geeridaada awgeed

Balse aniga iimaan
Yaa Ilaah isiiyee
Muslimiinta gaanka ah
Aan Eebe garanayn
Kuu ooyi adigaan
Aad ugu ilmeeyaa
In ay Erayga raacaan
Injiilka ay rumeeyaan

Balse adiga Axmedow
Ardaydaad daryeeshaa
Amaan kuu hibaysee
Intii aad arsaaqday
Ama aad difaacday
Cilmi aad u tira badan
Uurkooda gelisaan
Ku ilaabin abidkood

Adna inan Ilaahoo
Eed la' baad ahaydoo
Ilaahay agtiisiye
Aadanaha kaleetaba
Waad ku eed la'dahay

2 Micnaha “Alfa iyo Omega” ayaa ah in Eebbe yahay mid jiray misna jiri doona weligiis.



Dhammaan agahooda


Injiilkaad akhrisay baa
Ummadeena gaaroo
Nabaddaad dhigaysaa
Aan u wada riyaano
Oon kugu xusuusani


Ilaah baan baryaayaa
Axmed waa na deeqee
Haddii uu inaga tegay
Axmed kale allow keen
Innoo dhiga injiilka
Agoontana difaaci
Amba qaadi nabadana
Aargoosan abidkiis
Cafis lagu aqoonsado
Aamiinna ila dhaha
Ilaah yaa aqbaliye

SHUHADADA

Aweis A. Ali

Shuhadada Ilaahee
Loo dilay iimaankood
Inta aanan garanayn
Yaa aad u fara badan
Inta aan ogahay uun
Uurka aan ku haayo
Oodda aan ka qaadee
Dhegahiina ii fura
U ballaqa uurka





Afka waxaan ka sheegaba
Gaarsiiya uunkoo
Ha ogaado aadmigu

Liibaan ina Ibrahim³
Wadaaygeey ahaayee
Dadka in uu caawiyo
Ayaa lagu ogaayoo
Isagoon wax bi'inoo
Addinkiisa eersan
Ayaa duul habaarani
Rasaas ay la maageen
Waxa ay u dilayeen
Adduunyada u dhaafsheen
Iimaankiisa weeyaan
Ciise uu ku qabay uun

Axmed Goobbe⁴ isaguna
Innankii Ilaahoo
Eed aan lahaynoo
Loo riyaayay iga dheh
Aqoon buu lahaayoo
Indhuhuu bogsiiin jiray
Cidna ma uu xumaynoo
Shaqsi eedna kama gelin
Waxa ay u dilayeen
Adduunyada u dhaafsheen
Iimaankiisa weeyaan
Ciise uu ku qabay uun
Saleebaan⁵ isaguna
Samafaluu ahaayoo
Ii eg aniga muuqaal,

3 Liibaan Ibraahim Xasan (1968-1994) wuxuu ahaa wadaad kiniisadeed iyo samafale daacad ah

4 Axmed Cayntow Goobbe (1948-1994) wuxuu ahaa Masiixi bartay cilmiga dawaynta indhaha.

5 Saleebaan Maxamed Saleebaan (1968-1994) wuxuu ahaa Masiixi iyo samafale




Midab aan wadaagnay
In aan nahay mataano
Dadka qaar u haysteen
Injiilkuu jeclaayoo
Aad uu u haystay
Waxa ay u dilayeen,
Adduunyada u dhaafsheen
Iimaankiisa weeyaan
Ciise uu ku qabay uun

Xaaji Maxamed⁶ uunkuu
Ugu aqoon badnaayoo
Kanaduu u tegay cilmi
Dadkiisana usoo noqoy
Ciyaalkuu u rabay nolol
Wax in ay bartaanee
Awood uu ku bixiyay
Tacliin iney helaane
Waxa ay u dilayeen
Adduunyada u dhaafsheen
Iimaankiisa weeyaan
Ciise uu ku qabay uun

Sheekhdoon⁷ isaguna
Eed muu lahayne
Dalkuu dib u dhisaayay
Dadkuu u adeegay
Waxaa uu u hurayay
Wakhtigiisii oo idil
Shaqo aad u sharaf badan
Ayaa lagu xusuustaa
Waxa ay u dilayeen

6 Professor Xaaji Maxamed Xuseen (1951-1996) wuxuu ahaa Masiixi, aqoon yahan iyo samafale.

7 Maxamed Sheekhdoon Jaamac wuxuu shahiiday 1996 wuxuuna ahaa samale qibrad iyo aqoon leh



Adduunyada u dhaafsheen
Iimaankiisa weeyaan
Ciise uu ku qabay uun

Faarax ina Ibraahim⁸
Dabka ayuu samayn jiray
Gudcurkuu intuu nacay
Iftiin uu u bedelay
Aabbihii ilayskoo
Uursan buu ahaayoo
Dad abaal u galayoo
Edeb lagu yaqaanay
Waxa ay u dilayeen

Adduunyada u dhaafsheen
Iimaankiisa weeyaan
Ciise uu ku qabay uun

Xuseen Aadan⁹ isagana
Xabsi ayay taaxaabeen
Jirdil ayay u gaysteen
Madaxii ul kala dhac
Uurka iyo araxdana
Laad ayay la maageen
Xanuun baa asiibay
Waana uu ilmeeyay
Waxa ay u dilayeen

Adduunyada u dhaafsheen
Iimaankiisa weeyaan
Ciise uu ku qabay uun
Ina Mustaf Makaa'iil¹⁰
Bal maxay u mageen?
Ashahaadadoodaba

8 Faarax Ibraahim Caddaawe (1965-2000) wuxuu ahaa Masiixi, samafale iyo farsamayaaan aaladaha dabka ku shaqeeya

9 Xuseen Aadan Axmed (1965-2006) wuxuu ahaa Masiixi, macalin iyo xoogsade.

10 Cali Mustaf Makaa'iil (1984-2006) wuxuu ahaa Masiixi iyo arday jaamacad dhigta.



Haddii uuba diiday
Nabad ay ka helayeen
Bal maxay u toogteen?
Qasab ma ahan diintuye
Miyaa la is dirqinayaa?
Waxa ay u dilayeen
Adduunyada u dhaafsheen
Iimaankiisa weeyaan
Ciise uu ku qabay uun

Mansuur¹¹ tii ay ku dhigeen
Fiidiyow ku aragnaye
Aayado Qur'aan bay
Ay ku dul akhrinayeen
Mindi aan afba lahayn
Qoorta uga gooyeen
Dhiiggi ay ka daadsheen
Yaa weli i horyaal
Waxa ay u dilayeen
Adduunyada u dhaafsheen
Iimaankiisa weeyaan
Ciise uu ku qabay uun

Cabdulwahaabna¹² inta ay
Geed ay ku xirteen
Handadaad u raacsheen
Afxumana ku miiseen
Rasaas ay ku fureen
Iyagoo ku faraxsan
In uu Ciise dafirayn
Ayay kama xumaadeen
Waxa ay u dilayeen

11 Mansuur Maxamed (1983-2008) wuxu ahaa Masiixi iyo samafale.

12 David Cabdulwahaab Maxamed Cali (1979-2008) Wuxuu ahaa Masiixi howl kar ah.




Erayga Ilaahbuu
Adduunyada ka doortay
Halis wuxuu u marayay
Ciisuu jeclaa uun
Injiilkiisi doortay
Uunka inuu la gaaro
Waxa ay u dilayeen
Adduunyada u dhaafsheen
Iimaankiisa weeyaan
Ciise uu ku qabay uun

Merlin Macalin¹⁶ ayuu
Arday badan u ahaa
Iyana way jeclaayeen
Waa u mahadnaqaayeen
Isagoo wax qorayaa
Abley loola yimid uun
Uurka ay ka geliyeen
Islaantisi weerareen
Waxa ay u dilayeen
Adduunyada u dhaafsheen
Iimaankiisa weeyaan
Ciise uu ku qabay uun

Salvatore¹⁷ aabbaheen
Oday buu ahaayoo
Eebbana ka baqi jiray
Awliyyuu ahaayoo
Dalka iyo dadkaba jecel
Waana ay dileen uun
Dadki ayaana yaabay

16 Merlin Russell Grove (1929-1962) wuxuu ahaa macalin iyo wadaad dadka ku wacdiya Kitaabka Injiil.

17 Bishop Salvatore Colombo (1922-1989) wuxuu ahaa wadaadka ugu sareeya Kiniisadda Kootaliga ee Soomaaliya wuxuuna ahaa wadaad Eebbe iyo dadkaba jecel.



Waana uur xumaadeen
Waxa ay u dilayeen
Adduunyada u dhaafsheen
Iimaankiisa weeyaan
Ciise uu ku qabay uun

Annalena¹⁸ iyaduna
Hooyay noo ahaydoo
Adduunkaba Soomaalida
Ayay ugu jeclaydoo
Masaakiinta oo idil
Ehel ayay u ahayd
Sanado aad u farabadan
Ayay noo adeegtay
Waxa ay u dilayeen
Adduunyada u dhaafsheen
Iimaankeeda weeyaan
Ciise ay ku qabtay uun

Martin¹⁹ Ilaah buu
Aad u jeclaayoo
U adeegga Rabbiguu
Soomaaliya u yimid
Dantanada uun mooyee
Tiisabaa ma eegayn
Aqligii mid laga xaday
Ayaa maagay keligii
Waxa ay u dilayeen
Adduunyada u dhaafsheen
Iimaankiisa weeyaan
Ciise uu ku qabay uun

18 Dr. Annalena Tonelli (1943-2003) waxay ahayd Masiixiyad, samafale geesi ah oo dadka jecel; waxay ku takhasustay cilmiga sharciga.

19 Martin Jutzi wuxuu ahaa Masiixi Rabbiga jecel oo doonayay in uu gargaaro Soomaalida. Waxaa uu shahiiday 2003.




Leonella²⁰ iyaduna
Ehel ayay ahaydoo
Caafimaad ay barateey
Dadka ugu adeegtay
Iyaddoon adduun rabin
Derejana an doonayn
Waa Ilaah dartiis uun
Wanaaggii ay falaysay
Waxa ay u dilayeen
Adduunyada u dhaafsheen
Iimaankeeda weeyaan
Ciise ay ku qabtay uun

IDILKIINBA ADDEECA

Bashiir Muuse

Afartii Absamaad iyo
Adeerkood Galimays
Abgaalkii Aw Cismaaniyo
Inamadii Mudulood
Arladii wadankeenna
Uunkaa wada yaala
Arrinbaan u wadaayee
Idilkiimba dhagaysta
Eegmo diidmo ku taalliyo
Afgobaadsiga daayoo
Ilaahiinna ka yaaboo
Idilkiinba dhagaysta

20 Sister Leonella Sgorbati (1940-2006) waxay ahayd Masiixiyad iyo kalkaaliso caafimaad oo nafteeda iyo wakhtigeedaba u hurtay Soomaalida. Magaceeda kale ayaa ahaa Rosa Maria Sgorbati.



C. A. Axmed

Aadam iyo Xaawa
Eeddii ay galeeniyo
Idilkeed dunuubtaba
Inuu qaado awgeed
Kuu Ilaah u doortee
Adduunyada la keenow
Abidkeenba Ciisow
Waan ku aaminaynaa

Illayn adiga weeyaan
Iftiinkii runta ahaa
Urkaad nagaga taallee
Usha kaalay noo qabo

Gooriyo ayaanba
Waxa aan u orodnaa
Injiilkii xaqaa ahaa
Ifka inuu ku baahoo



Nimcadiisu uunkiyo
Wada gaarto aadmiga
Idilkeenna Ciisow
Ku ammaanno weligeen

Illayn adiga weeyaan
Iftiinkii runta ahaa
Uurkaad nagaga taallee
Usha kaalay noo qabo

INAAD TAWBADKEENTO

C. A. Axmed

Midka jecel Injiilkee
Dhab ahaan u aaminay
Hawlaha adduunkana
Dar Ilaahay uga tegay
Rabbigana addeecoo
U adeega weligii

Inanka iyo Aabbaha
Iyo ruuxa aaminay
Ayuumbaa ayaan leh

Adiguna warmoogow
Inaad tawbadkento
Imminkaba bal doondoona

Midka oggol Masiixee
Xertiisii ahaaday





U khushuuca Eraygoo
Raaca amarka Eebbe
Naftiisana edbiya oo
Ka ilaasha xumihii

Uurkiyo afkiisuna
Abid Ciise qirayaan
Ayuumbaa ayaan leh

Adiguna warmoogow
Inaad tawbadkeento
Imminkaba bal doondoona

QIRASHO

C. A. Axmed
.....

Eebbow adiga mooyee
Ilaah kale ma jiro oo
Samadiyo arlada
Waxa uun ku nool
U yihiin addoomo
Aniguna hortaadaan
Inaan ahay dembiile
Imminkaba ku qirayaa
Iga cafi Allahayow
Dhammaan eedahaygiyo
Waxaan geystay oo idil

Afka waxaan ka sheegaa
Waxaa uurka iiga jira



Rabbow ammaani kelidaa
Ha kuu ahaato weligeed

Waxaad tahay Ilaah jira
Oo aan iin lahaynoo
Abidkii qudduus ah
Wax walbana abuuray


Xukun iyo awood leh
Naftayduna ayaamahan
Waxa ay la ooydaa
Xumaanteeda awgeed
Ii daahiri Allahayow
Indhihiyo qalbiga iyo
Guud ahaanba oogada


Afka waxaan ka sheegaa
Waxaa uurka iiga jira
Rabbow ammaani kelidaa
Ha kuu ahaato weligeed

ILAAH BAA MAHAD ISKA LEH

C. A. Axmed

Iblays inuu yahay sharwade
Aadmiga inuu lumiyo jecel
Jaahil baan weli ogaynoo
Olelehiisana xaq mooday





Waxaase ayaan leh maanta
Ruuxii oggolaaday Ciise
Haddana inta uu addeecay
Injiilkana faafinaaya

Ilaah baa mahad iska leh
Na siiyay Arijir wacanoo
Annaga na ilaalinaayoo
Addoonnimo naga xoreeyay

Qaar baa galab iyo aroorba
Shaydaan iska daba ordaayoo
Ilayskiyo nuurkan baxay
Ka nacay uurkiyo qalbiga

Qaar baase iftiinkii helay
Rabbiga aaminoo aqbalay
Albaabkii badbaadadiyo
Loo furay irdihii jannada

Ilaah baa mahad iska leh
Na siiyay Arijir wacanoo
Annaga na ilaalinaayoo
Addoonnimo naga xoreeyay

SIDEE BAAD ILAAHAY

C. A. Axmed
.....

Adigoo walaalkaa
Oo ay qaban ishaadu



Nacayb uurka ugu haya
Sidee baad Ilaahay
Oo aanad weli arag
U jeclaan karaysaa?

Ha illaawinee garo
Rabbi amarradiisana
In la wada adkeeyo
Inay lama huraan tahay

Maal iyo Ilaahay
In la wada jeclaan karin
Sow Injiilku nama barin
Ogow labo ugaas ah
In la wada addeecana
Waa midaan ahaan karin


Ha illaawinee garo
Rabbi amarradiisana
In la wada adkeeyo
Inay lama huraan tahay

INAAN NAHAY KUWAAGII

C. A. Axmed
.....

Amarradaad na siisay
Ee adkeeya nagu tiri
Midka udub dhexaad u ah
Inuu yahay jacaylku
Maannaan illaawine
Uurkaan ku haynaa





Ruux kastoo ku aamina
Ku addeeca baa nolol
Aan idlaanin weligeed
Ayaan iyo nasiib u leh

Carmalkiyo aqoontu
Inay yihin kuwaa tiri
Naxariista awgeed
Indho qumman ku eega
Rabbow waan ogsoon nahay
Waana kaa ajiibnaye
Waana waxa uu aadmigu
Nagu wada aqoonsadoo
Laynagu ammaanay

Ruux kastoo ku aamina
Ku addeeca baa nolol
Aan idlaanin weligeed
Ayaan iyo nasiib u leh



BOQORKII DUNIDEENNA

Bashiir Muuse

Buuralayda Hargaysiyo

Burco reeraha yaaliyo

Beesha Sheekha Isxaaq

Bishaaraan u sidaayoo

Barakooyin la yaabiyo

Bilkhayrbaan u sidaa e

Gadabiirsiga baaliyo

Ciisahaa banka yaala

Bishaaraan u sidaayoo

Bilkhayrbaan u wadaa

Buuhoodliyo Cayniyo

Bilicdii Ceerigaabiyo

Bari reeraha yaalla

Boqorkii Aw Burhaaniyo

Hartigaa badda yaala

Bishaaraan u wadaayoo

Bilkhayrbaan u sidaaye

Baladweyne Xawaadliyo

Beelahaa Hir-Shabeeliyo

Hawiyahaa badanee

Badda xeebta ku teedsan

Banaadiroo dhanba yaalla

Bishaaraan u wadaayoo

Bilkhayrbaan u sidaa

Baaydeeda Bakooliyo

Baydhabdeeda Janaayiyo

Beelaha Raxanweyniyo

Bilicdeeda Kismaayiyo



Beelahaan aga yaala
Bishaaraan u wadaaye
Bilkhayr baan u sidaa


Baxsanoo nebi Ciise,
Iyo Boqorkii dunideenna
Baafiyoo wada raaca
Ballankiisa rumeeya
Baahiyoo wada raaca
Injiilkiisa la booda
Barta oo wada qaata
Waa badbaadshe adduune
Isagaa ballan qaaday
Banaankii janadee
Barta oo wada raaca


GOORTUU BIGILKU UU DHACO

C. A. Axmed

Waxay ba' iyo hoogiyo
Belayadu duljoogtaa
Kuwa Sayidka beenshee
Injiilkana ka bayray
Intuu iblays u baaqay
Wada baadiyoobay
Iftiinkaa bidhaamaya
Gudcurkii ka doorbiday

Balse annaga Eebbow
Berigaa qiyaamee





Banka laysu soo bixin
Kuwa bohosha naartiyo
Ka badbaaday jahannamo
Boqorkow inaga yeel

Goortuu bigilku uu dhaco
Badbaadiyaha soo dego
Kuwa buunshadoo kale
Dab baxaaya lagu shubi
Waa ummadda beentiyo
U bareertay gaalnimo
Runtii loo bayaanshiyo
Xaqii baaddil mooday

Balse annaga Eebbow
Berigaa qiyaamee
Banka laysu soo bixin
Kuwa bohosha naartiyo
Ka badbaaday jahannamo
Boqorkow inaga yeel

WAA BISHAARADEENNEE

C. A. Axmed
.....

Kol haddaan bayaankiyo
Baaqii Injiilkaba
U bogayno maantoo
Eebbahay badbaadiyo
Ballanqaad na siiyay



Waa bishaaradeennee
Idinkuna bilkhayr dhaha

Annagoo belaayiyo
Sharta beegsanaynoo
Buulkii xumaantana
Bartankiisa joognuu
Xaqii noo bidhamaye

Waa bishaaradeennee
Idinkuna bilkhayr dhaha

Kol haddaan ka bayrray
Mugdigii ba'naa iyo
Baradii madoobayd
Nuurkan loo bogaayana
Boqorkeen na siiyay

Waa bishaaradeennee
Idinkuna bilkhayr dhaha

BOQORKII BOQORRADA

C. A. Axmed
.....

Qalbigii birta ahaa
Sharka beegsan jirayoo
Belaayadu dhex jiiftay
Rabbow adaa bogsiiyoo
U bidhaanshay nuurkoo
Farxaddana ka buuxshay





Badbaadshihii naftaydow
Jacaylkaagan bi'in baa
I barbaarinaayee
Baryadayda maqaloo
Mar kastaba i barakee

Anoo baadiyoobay
Iblays baylah iga helay
I baashaalinaayo
Adaa runta i barayoo
Dabkii igu baxaayay
Dhaqso iga bakhtiiyay

Boqorkii boqorradow
Naxariis badnihiyow
Waan kugu baraaraye
Baryadayda maqaloo
Mar kastaba i barakee

A stylized, bold, black letter 'J' is centered within a light gray square. The 'J' has a thick, solid black body and a curved tail that hooks to the left at the bottom. The square background is a uniform light gray, creating a high-contrast logo.

DARTEEN KII LOO JARIBAY

Y. B. Xirsi

Halaagii soo jiriyo
Jabkuu shaydaanku baday
Bukaan jiif loo ahaa
Sayidka samadaa jiriyo
Aabbaha janadaa ku jira
Ayaa na jiheeyayoo
Qalbiga ruuxaa ku jira
Jacayl raxmad noogu shubay

Darteen kii loo jirabay
Musbaar lagu joojiyee
Jidhkiisii cadawgu jaray
Badbaadaan jiri lahayn
Jidhkiisoon naloo jarjarin
Jidhkiyo naftaan siinayaa

Dhammaan cuduradi jiriyo
Dadkii jinku wada xidh xidhay
Masiix baa ka joojiyoo
Nimcadu jaahiisa tahay
Qalbiga wuu jiitayoo
Runtii kama jeedsan karo
Farxadna waan jiboonayaa

Darteen kii loo jirabay
Musbaar lagu joojiyee
Jidhkiisii cadawgu jaray
Badbaadaan jiri lahayn
Jidhkiisoon naloo jarjarin
Jidhkiyo naftaan siinayaa



JACAYL WAA KANE U KAALAY

C. A. Axmed

Warhoy ka fogow jahliga
Ha raacin jidkaa qalloocan
Illayn jahannamuu ku gaynool
Jaarbuu kaaga dhigi iblayski
Ka jeestay amarkii eebbe

Jacayl waa kane u kaalay
Miftaaxii jannada weeyee
Adduunka intaad duljoogto
La noqo jaal wacan Masiixa

Warhoy laab jilicsan muuji
Naftaadana ha ku jujuubin
Waxaan jirinee iblaysku
Ku duufsado hadiyo jeerba
Kuwaan weli jaman Injiilka

Jacayl waa kane u kaalay
Miftaaxii jannada weeyee
Adduunka intaad duljoogto
La noqo jaal wacan Masiixa

Warhoy iska daa jikaarkoo
Jar iyo buur hayska tuurin
Naftaadana haw jihataynin
Shaydaanku wuxuu jideeyay
Jaxiimada lagu mutaysan

Jacayl waa kane u kaalay
Miftaaxii jannada weeyee
Adduunka intaad duljoogto
La noqo jaal wacan Masiixa



MASIIXA U JEELLANOW

C. A. Axmed

Intaad jiribaadba gelin
Iblays kaa xirin jilbaha
Jacaylka ilaahay garo
Oo kaalay jidkiisa baro
Injiilku jiheeye weeyoo
Xag Eebbe u jiida uunkoo
Xaqiyo kala jeexay beentoo
Caddaalad jideeye weeyaan

Waxaan jaallow ku oran laa
Masiixa u jeellanow
Si aad nolol abid jirtiyo
Janniyo raaxaba u hesho

Shaydaan kamuu joogsan abid
Jillaafo inuu u dhigo
Qofkuu jiljileec ka helo
Oo aan xariggaba u jarin
Intaanu ku jiidan weli
Waxaan jirin kugu sasaban
Ka jeedso xaggiisa oo
Injiilka u soo jarmaad

Waxaan jaallow ku oran laa
Masiixa u jeellanow
Si aad nolol abid jirtiyo
Janniyo raaxaba u hesho



HADDAAD JECESHAHAY ILAAH

C. A. Axmed

Kollay ruux jajuubano
Iblaysku jaraystay baa
Jar iyo buur dheer ka lusha


Adoo jiritaanka eebbe
Kun iyo kow jeer qiraaya
Diin aan jirin yay ku lumin

Haddaad jeceshahay Ilaah
Oo aad u jidbaysan tahay
Intaad jiribaadba gelin
Masiixa jidkiisa raac

Kollay jaahil baan ogayn
Jihaduu ku badbaadayoo
Janniyo nolol uu ka heli

Adoo xaq jeel u qaba
Gees kale haw janjeersanine
Ka joog dhalanteedka baas

Haddaad jeceshahay Ilaah
Oo aad u jidbaysan tahay
Intaad jiribaadba gelin
Masiixa jidkiisa raac







XOG WARRAN

Aweis A. Ali

Xalay aniga oo ladi
Xayndaabka hooygiyo
Xeradeena jiifa

Riyo xiiso badan loo
Oon weli xusuusto
Xaakim ila wadaagee

Axmed Xaylihi²¹ tegay
Xigmad badane weeye
Ee Xaakim oofsaday

Xaajagal ahaayee
Xushmo nagu lahaayee
Aad loo xurmayn jiray

Xamar iga waraystoo
Sida xaalku uu yahay
Xuduudaha dalkoo dhane

Xornimaan u hadalnoo
Xaal waraysi dheer baan
Xaraf xaraf u siiyee

Xiisad iyo colaadiyo
Abaar xaaluf keentaa
Kumanaan xijaabteen

21 Professor Axmed Cali Xayle (1953-2011) wuxuu ahaa Masiixi, aqoon yahan, nabaddoon, aftahan iyo deeqsi aan agtiisa lagu qadin.



Xagaldaacday xaajoo
Xigaalkaa is dilayee
Waa xaraarug xaalkuye

Wuxuu xayle igu yiri
Qof haddu xisaabtami
Xasuuq iyo ma gaysteen

Xeebaha sun kuma shubo
Dhirta xaaluf kama dhigo
Xoolo dhedig ma dhoofsheen
Dalka muu xumeeyeen
Xabaalaha ma faagteen
Xadgudub ma gaysteen

Abti laga xishoon jiray
Xoolihiis ma boobeen
Xinjirtiis ma daadsheen

Wuxuu yiri xumaantaas
Colaadaha xad dhaafkaa
Xal ayaa uun loo heli

Xilahaan ka tegay iyo
Ilma Xayle oo idil
Xaalkooda ii sheeg

Marrastaadi Xaylow
Xaakim baa ilaalshoo
Way ku wada xusaayaan

In ay xariga Eebe
Ay xoog u haystaan
Reer Xayle gaarsii



Adigey xilsaaraye
Anigoo ku soo xigan
Xasil yaan u gaarsiin

Isagoo xaraga socon
Ku xerooyay janadii
Xeeldheeraheenii

XEROW XUSUUS MUDAN

Maxamed Gurxan

Xigaalkii nabaddee
Xiisaddiisa samihiyo
Xal uhelid masiibada
Xarafkeeda dhigayee
Xarbigaa colaadaha
Xaladhaleyda raadshee
Xumahoo la diidiyo
Xurguf kadhawrsiga
Xaal in loo mastuuriyo
Xaajogal ahaayoow

Xayow Axmed Xayloow²²
Xerowgii Eebbiihiisee
Xulashada walaalaha
Xilbax loo nisbeeyee
Xurmo nagu lahaayee
Xusuusteenna mudanow

22 Professor Axmed Cali Xayle (1953-2011) wuxuu ahaa Masiixi, aqoon yahan, nabaddoon, aftahan iyo deeqsi aan agtiisa lagu qadin.



Xulafadiisa Eebbahay
Xiise kii u badiyee
Xajinaayay qirashada
Xarafkii Waqiisee
Xubbigiis ahaayeen
Xadhiggiisa gooynee
Xarakada Masiixiyo
Xamdigiisa badiyee
U xadreeyay dhaaxee
Xubin wayn ka qaatoow

Xayow Axmed Xayloow
Xerowgii Eebbiihiisee
Xulashada walaalaha
Xilbax loo nisbeeyee
Xurmo nagu lahaayee
Xusuusteenna mudanow

Xaasaan miskiiniyo
Xafaare taag daran
Xanfaf nimuu helay
Xantiire qoys galay
Isagoon u kala xilan
Xurquunkii daruuriga
Xagagab wuxuu helo
Kii u xaasinaayee

Xayow Axmed Xayloow
Xerowgii Eebbiihiisee
Xulashada walaalaha
Xilbax loo nisbeeyee
Xurmo nagu lahaayee
Xusuusteenna mudanow





Xigtada kuwuu baday
Xalli yidhi amuurtood
Xinif iyaguna qabay
Xubintii laxaadkiyo
Kaa xuubshay xooggii
Lama aad xintaminee
Xeerkii Injiilkiyo
Suu Xaakimkeen qiray
Xabad kii ka saaree
Xugmay caafintoodow

Xayow Axmed Xayloow
Xerowgii Eebbiihiisee
Xulashada walaalaha
Xilbax loo nisbeeyee
Xurmo nagu lahaayee
Xusuusteenna mudanow

Xaruntiisa reerkiyo
Hadba xerada uu dego
Kii loo xoomi jirayee
Xirgida cuqaashiyo
Xaajoodka sheekhyada
Xigmadoo la qaybsado
Xifaalaynta guudiyo
Xogwaranka mooyee
Iyadoon xanaaq jirin
Doodda xalin jirayow

Xayow Axmed Xayloow
Xerowgii Eebbiihiisee
Xulashada walaalaha
Xilbax loo nisbeeyee
Xurmo nagu lahaayee
Xusuusteenna mudanow





Xile Maarta Xayliyo
Xayi Afraxii curad
Xubbidaa Safiya iyo
Xuur Geeddi Yarihii
Qoyskaad xannaaniyo
Xoojinaysay kaalmada
Rabbigaa xawilayee
Xuska adiga mooyee
Xagaldaaci maayaan
Ka xijaaban baalluhu

Xayow Axmed Xayloow
Xerowgii Eebbiiisee
Xulashada walaalaha
Xilbax loo nisbeeyee
Xurmo nagu lahaayee
Xusuusteenna mudanow

Xaggii loo badnaa iyo
Xudinteeda aakhiro
Xukunkiisa Eebbaha
Xalaal baad ahaydoo
Xisbigii Masiixiyo
Xaqii aad rumaysaa
Xisaabtaada qaadayo
Ku xarootay jannadee
Xigmadiisa Rabbigaan
Xallad naawilaynaa

Xayow Axmed Xayloow
Xerowgii Eebbiiisee
Xulashada walaalaha
Xilbax loo nisbeeyee
Xurmo nagu lahaayee
Xusuusteenna mudanow



XAMDIYO FARXAD


Y. B. Xirsi

Jinkiyo xadhkihii iblays
Xumiyo dadka xaasid baray
Xaqiiq xoog naga fufura
Ayaa xagga sare ka yimid
Xinjirta dhiigiisabaa
Walaal naxoraysayoo
Xamdiyo farxad baan wadnaa

Xaqsooroow Sayid Masiix
Nimcadu ay xaggiisa taal
Xumiyo dembigii la galay
Xaawiyo Aadan kay dhigeen
Illaa xiligeenan jiraa

Masiixbaa xambaartayoo
Intuu xukunkii cafiyay
U qubay xinjir dhiig quduus
Walaal waan xorawnayoo
Xamdiyo farxad baan wadnaa

Xalaal quud lagu cuniyo
Xaqnimo nolol lagu xasilo
Rumee xaggiisaad ka helii
Dhammaan xeerkaa iblays
Masiixbaa xaabsadoo
Walaal na xoreeyayoo
Xamdiyo farxad baan wadnaa







NABAD

Aweis A. Ali


Door weeye nabadduye
Innagaan dareemine
Dadka kaleba wuu garan
Dunidaba ma eegteen
Daafaha aduunyada

Axmed Xayle²³ dersinkii
Durruustuu dhigaayay
Ku dadaala nabaddoo
Demiya dagaalada
Waa taan ka diidnee

Xayle derin innoo dhig
Salool iyo bun noo dub
Dabka demiya nagu yiri
Innuu dilaba mooyee
Dagaal wiil ma koriyee

Maxaa Carab innoo daran
Dalkood ugu tahriibnaa
Saxaraha dugaag dila
Dadkeen ugu lugeeyaa
Harraad ugu dilaayaa

Dalka yaan la diiran
Dadka yaan la dilinoo
Dhaqan dawyo soo jiray
Dastuur iyo nidaam baa
Nabad lagu dabbaashaa



23 Professor Axmed Cali Xayle (1953-2011) wuxuu ahaa Masiixi, aqoon yahan, nabaddoon, aftahan iyo deeqsi aan agtiisa lagu qadin.



Waa dardaaran Xaylee
Waala dereja beeliye
Dibad joog ayaan noqon
Dadkaa nagu maadsani
Haddaan nabad la dooran

Dalkan mee dadkiisii
Day day iyo mooryaan
Yaa dooxanaayee
Dadki iyo dalkiiba
Dhiig baa da'aayee

Bad miyaa innoo dihan
Roob miyaaba noo da'a
Doog miyaa innoo baxa
Xoolo daaq innoo taga
Wayna moora duugeen

Xaylaa Daa'im tuugoo
Dabiib iyo allow keen
Nin door noo dagaalama
Maatida difaaca
Danta guud ilaalsha

Ducadaas Ilaahbaa
U aqbalay dadkiiyoo
Dayuusinti inna dilay
Dabadeyba taageen
Daanyeer sidiisii

Waala doogsan doonaa
Heedhe yaan la dacaroon
Dembiyo dad soo gelay



Tegi karin dalkoodii
Yaaney nagu danaysan

Dumar iyo ragow toos
Daa'im idin derejee
Dalya duunyo idin sii
Ka difaacda tuugada
Hadba shaar dadkuu xiran

Kuwa calanka diidee
Indheer garad dilaaya
Dawladnimada diiddan
Xaylaa u digayoo
Dacwad baa sugaysaa


Dalka waan dhisaynaa
Dadka waala daaweyn
Dakanada kuwii galay
Xaylaa u digayoo
Dacwad baa sugaysaa

XAYLAA KA DIGAY

Aweis A. Ali

Dadka oo xumaaniyo
Colaadiyo dillodeen
Iska dooxa maatida
Duniduna ay yaabtay
Doqonimada teenaa





Axmed Xayle²⁴ noo digay
Dadka yaan la dilinoo
Dalka yaan la duminoo
Dhulkan deexda weyn le
Wuuna wada deeqaa

Duunyo iyo ku bixi deeq
Daliil iyo la yimid qiil
Dagaal ooge yaal baa
Dirir iyo la galayoo
Dadaalkiisi diidee

Al-Jaziira dulmigii
Dacaayaddey faleysay
Iyo kuwi ka daba qoray
Qaran diid ka soo qaad
Nabad aanba doonayn

Daa'imow dalkaan nabad
Deegaanka wada sii
Dabinkana innaga saar
Derisnimo wanaag iyo
Dawladnimadu waa guul

Dalka nagu mid weeyaan
Dadkiisa innoo qoran
Dab-joog iyo duur-joog
Duunyadiisa oo idil
Diiwaan ku kaydsane

Hawadaa innagu dedan
Dakhliga ka soo baxa

24 Professor Axmed Cali Xayle (1953-2011) wuxuu ahaa Masiixi, aqoon yahan, nabaddoon, aftahan iyo deeqsi aan agtiisa lagu qadin.



Dad kalaaba maamulan
Xaylaa ka digayoo
Damiir xumo weeyaan


Baddaa dahabku ceegago
Daa'im dhaxal innoo sii
Dib baa loo cabirayaa
Xaylaa ka digayoo
Dibin daabyo weeyaan


Dhir haddii la dabar jaro
Hawaduna ku diiqow
Roobna di'i maayee
Xaylaa ka digayoo
Macluul yaa dillaaciye

Dadkanaga dul iyo hoos
Isku derejo weeyaan
Afar iyo bar diidnoo
Xaylaa ka digayoo
Dadbaa lagu takooraa

Dawladaha deriskaa
Mid waliba dantiisuu
Dadkayaga u laayaa
Xaylaa ka digayoo
Digtoonaantu waa taa

Danta caalamkaa ah
Inaan laba dawoobin
Oo dagaalku raagee
Xaylaa ka digayoo
Innagaan dareemine





Doqon iyo damaaci
Damiir laawe oo idil
Dibindaabyadooda
Xaylaa ka digayoo
Nama dagi karaayaan

IGA DADAB ALLAHAYOW

C. A. Axmed
.....

Inaan ahay dembiilaan
Duhuriyo habeenba
Daa'imow hortaada
Ugu qiran si daacada
Waxaan doonayana waa
Inaad iga dulqaaddood
Iga dhigto mid daahir ah

Dunidani sharkeediyo
Damac yuu i qaadine
Dabinnada iblayskana
Iga dadab Allahayow

Dabcigaygii hore baa
Dulmi ii xambaarshoo
Iga dhigay xaq diidiyo
Mid dawgii ka weecdaye
Tawbad baanse doortaye
Cafis iigu deeqoo
Ha deyrin Eebbow



Dunidani sharkeediyo
Damac yuu i qaadine
Dabinnada iblayskana
Iga dadab Allahayow

RABOW KUMA DAFIRAYO


C. A. Axmed
.....


Dembigaygii anigoo
La daalaa dhacaayo
Adigaa i doortoo
Ii daweyay laabtiyo
Qalbigaygii dooxnaa

Anna gu'iyoo deyrba
Dadkaan kugu hor qiranoo
Rabbow kuma dafirayee
Duhuriyo habeenba
Adiguna i daadihi

Sidaad ii daryeesho
Nolol iigu deeqdo
Dhiiggaagoo daahira
Sow ani daraadday
Umaad daadin Sayidow

Anna daali maayoo
Uunka dunida joogaan
Xaqa dawguu yaalliyo
Tusayaa dariiqee
Adiguna dareensii





KAN II DUDAYA YEELKII

C. A. Axmed

Daa'inkii i uumay
Kol hadduu i doortay
Anigoo dembiile ah
Igu duway xaqiisii
Hadday maanta dunidiyo
I nacaan dadkoo idil
Dani igama haysee
Kan ii dudaya yeelkii

Masiixii u soo degay
Inuu daahir iga dhigo
Kol haddaanan dafirayn
Oon u ahay mid daacad ah
Haddii uu nin doorkiyo
Ii caroodo doqonkuba
Nafta uma dabraayee
Kan ii dudaya yeelkii

Dabiibkeennii waynaa
Kol hadduu daweeeyay
Qalbigaygii dooxnaa
Ooy daxashu saarrayd
Hadduu maanta deriskiyo
I dagaalo ehelkuba
Dib u laaban maayee
Kan ii dudaya yeelkii

Haddaan mawdka dabadii
Duulkaa jannada udug
Dhex dabbaalanaayiyo



Sayidkaba la degayo
Hadday maanta dumarkiyo
Raggoo idil i dayrshaan
Dhib wayn uma dareemee
Kan ii dudaya yeelkii


DARIIQII BADBAADSHAHA

C. A. Axmed

Masiixii daraaddeen
Dhiiggiisii u daadshay
Isagoon dembi lahayn
Oo weliba daahir ah
Xagga sare ka soo degay
Dawo ma laha qoomkaan
Nimcadaa dareemayn
Waa dogob sidiisii
Ama duunyadoo kale
Daahse igama saarna
Inay mudan cadaab daran

Ummad yahay dunidu waa
Degel lagu negaanayn
Waxse daarta aakhiro
Eebbahay la noqon deris
Kuwa raacay dawgiyo
Dariiqii badbaadshaha

Masiixii la soo diray
Duruustuu inoo dhigay





Damiin baanan weli garan
Iyo doqonta dhoohanee
Iblays dabarka ugu xiran
Damac ma laha ruuxuu
Shaydaan baas dullaystay

Waxse iga dardaaran ah
Intaad ducada badisaan
Tawbadkeena duulyahaw
Xaqa diiday ee lumay

Ummad yahay dunidu waa
Degel lagu negaanayn
Waxse daarta aakhiro
Eebbahay la noqon deris
Kuwa raacay dawgiyo
Dariiqii badbaadshaha

DAFIRAADDA CIISE

C. A. Axmed
.....

Dulmi aadmi uu falo
Runtii waxawgu sii daran
Xaqa oo la diidiyo
Dafiraadda Ciisee
Illayn daarta aakhiro
Isagay dadkoo idil
Soo horjoogsan doonaan
Dacwaddooda qaadayoo
Dembilaha xukumayee



Doqon baanse weli garan
Dabinnada iblayskiyo
Beenta lagu dagaayee
Dawo ma laha ruuxaan
Dugsanayn Masiixaba

Dullinimo waxay tahay
Ruux malab durduraya
Dibnahiisii laga xiray
Oo dacar la leefsiin
Taasna waxaa daliil u ah
Qaar la duufsadoo badan
In dawgii wacnaa iyo
Dariiqii xaq ahaa
Laga duway xaggiisii


Doqon baanse weli garan
Dabinnada iblayskiyo
Beenta lagu dagaayee
Dawo ma laha ruuxaan
Dugsanayn Masiixaba

DAB IYO DHAMAC LAYGU SHIDO

C. A. Axmed

Haddaan duunyo iyo maal
Naftayda daryeel u helin
Oo ay diiftiyo dhibtuna
Aniga deris ila noqdaan
Inaan damac aawadii





Rabbiga uga sii durkana
Dubaaqaygaba sooma gelin

Doqon baan weli ogaynee
Dunidu cunto iyo ma aha
Maryaha dusha laga huwado
Ee boqortooyada aan dumin
Ilaah doondoona weeyaan

Haddii dabar laygu xiro
Dab iyo dhamac laygu shido
Dubkoo idil layga rido
In lay dilo loo halgamo
Inaan silac wayn dartii
Dafiro Sayidkaan jeclaa
Diyaar uma ahi anigu

Doqon baan weli ogaynee
Dunidu cunto iyo ma aha
Maryaha dusha laga huwado
Ee boqortooyada aan dumin
Ilaah doondoona weeyaan

LAABTIINNAN DURUGTAY

C. A. Axmed

Sida duulkii nebi Nuux
Intaan daadku qaadin
Dullinimada awgeed
Dhex dabbaashay xumahoo




Digniintiyo farriimihi
Xagga daa'in uga yimid
Iska diiday oo kale
Dadyahow ha noqonine

Laabtiinnan durugtay
Laga daahay nuurkii
Masiixaa dawayn karee
Idinkoon ka daahin
Doondoona maantaba

Sida kuwa la duufsaday
Xaqa dafirayee lumay
Inaad dabagashaan baan
Haatan idiinka digayaa
Aqoon li'i daraaddeed
Haw dayicina khayrkiyo
Docday nimcadu taalliyo
Dariiqii badbaadada

Laabtiinnan durugtay
Laga daahay nuurkii
Masiixaa dawayn karee
Idinkoon ka daahin
Doondoona maantaba







RUUXA QUDUUSKA AH

C. A. Axmed

Runtii baad ahaydiyo
Nuurkaannu raacnaye
Raxmaddaad na siisay
Ha ku rayso laabtee

Waannu raadinnaaye
Rabbiyow ha nala jiro
Ruuxaa Quduuska ah

Kuwo adi ku raacay
Injiilkay rumeeyeen
Rug kastoo ay joogaan
Ka run sheega baan nahay


Waannu raadinnaaye
Rabbiyow ha nala jiro
Ruuxaa Quduuska ah

Ruun wada abaarsaday
Markuu helo gu' roobaad
Sida reerahoo idil
Ugu wada riyaaqaan

Yaan u raadinnaayee
Rabbiyow ha nala jiro
Ruuxaa qudduuska ah

Waddo lagu rafaaday
Raran iyo kulayl leh
Iyo raadkii shaydaan
Dib u raaci maynee





Rabbiyow had iyo jeer
Inuu Ruuxu nala jiro
Adna noogu roonow

RUUXNA YUU LUMIN

C. A. Axmed
.....

Ninka Rabbiga jeceloo
Runna ay ka tahay baan
Raasamaalka dunidiyo
Daba cayman raaxada
Nolol raagta oon go'in
Marna lagu rafaadayn
Noo roon waxaan heli
Marka uu raxmaankeen
Dhabtii raalli naga yahay

Kuwa loo riyaqee
Lagu raray Injiilkow
Ruuxna yaanu lumine
Ruun kastaba ku baxa oo
Wada gaara reeraha

Ninka raadka Ciisiyo
Tubta toosan raacaa
Raxmad aad u wayniyo
Nolol huban rajeeeye
War hoy kibir na roga iyo
Iblayskiyo rugtiisii
Nafta aan ka reebnno



Damac aan ka roorno
Rabbi baa na saacidi


Kuwa loo riyaqee
Lagu raray Injiilkow
Ruuxna yaanu lumine
Ruun kastaba ku baxa oo
Wada gaara reeraha

RABOW NAXARIIS U FIDI

C. A. Axmed
.....

Kuwaan weli garan runtiyo
Nolosha raagaysa weligeed
Oo raadkii iblaysku maray
Intay raaceen iyagu
Ka rooray Injiil xaq ah
Rabbow naxariis u fidi
Ka reeb xumihiyo sharkoo
Limaan leh rumaysad sugan
Rasmi ah ugu deeq iyaga

Kuwaan weli rajo la hubo
Ruuxdoodu aqoonsanayn
Oo aan xaqa raadinayn
Intay laabtoodu rogantay
Shaydaanku rafiig u yahay
Rabbow naxariis u fidi
Ka reeb xumihiyo sharkoo
Limaan leh rumaysad sugan
Rasmi ah ugu deeq iyaga







SAYIDKEENNA WANAAGSAN

Bashiir Muuse

Annagoo Sibi joogna
Sigad caano ka maalnay
Oo salaad tukanayna
Sayidkaa na salaamoo
Sooryo qaala na siiyo
Soo dhawaada yidhaadoo
Samadiisa diyaarshoo
Sahwigii iyo beentiyo
Dambigii naga saaroo
Nasifeeyay dhammaanoo
Saalixiin naga yeelay
Soo dhawaw soo dhawaw
Kala soocay walaal
Soo dhawaw soo dhawaw

Saxanoow i dhagayso
Sooyaalkeeda ciyaarta
Waa kasaahiday waayoo
Suugaanteed ma caddaynine
Aan sifeeyee dhagayso!

Sayidkeenna wanaagsan
Sumcaddiisa la yaabay
Samihiisa addoonka
Sameeyee wada gaadhay
Ha saluugine aamin
Salaaddiisiyo soonkiyo
Sahaydiisaba qaado
Sax dhohoo wada aamin
Saaxiibadaada wanaagsan





Saama layliyo gaajiyo
Silic baad ku jirtaane
Siraadkii mustaqiimkiyo
Suubanoo nebi Ciise
Sax dhohoo wada raaca


SILIC WAYN


C. A. Axmed

Sababtayda awgeed
Kii u sayray dhiiggoo
Silic wayn intuu maray
Qudha looga siibow
Saddex maalin dabadood
Safkii wada dhintoo idil
Kii sare uga kacayee
Loo qaaday samadow

Sayidkaan jeclaynow
Subax iyo habeenba
Nagu saacid Ruuxoo
Saacad waliba nala joog

Jidka suubanoo wacan
Saadir loo maraayiyo
Surinkii waxaad tahay
Siinna looga maarmayn
Sebi iyo qof waynba
Sida aan u idil nahay





Kii sahay badbaado
Sibraar nooga buuxshow
Sayidkaan jeclaynow
Subax iyo habeenba
Nagu saacid Ruuxoo
Saacad waliba nala joog

JACAYL AAN SALGUURAYN

C. A. Axmed

Adaa nimca wayn na siiyay
Iimaan sugan oo cajiib ah
Haddana naga soocay uunkoo
Siraadkiyo milixdii dunida
Inaan nahay nagu sifeeyay

Soo jeeda haddaad na tiri
Ballan weeyoo seexan maynee
Rabbow soo noqoshadaadaan
Si wayn annaguna u dhawrraa

Adaa dhabtii saamaxaaddiyo
Na faray samirkiyo dulqaadkoo
Haddana jacayl aan salguurayn
Inaan aadmiga ku soorriyo
Adaa samo nagu hanuunshay

Annana subax iyo habeen baan
Dartaa cirka sare u eegnaa
Rabbow weli waxaan sugaynaa
Inaad noo qaaddo samadee



XAQA WAYNU SII HURIN


C. A. Axmed

Kuwa samaha diidee
Surinkii Ilaahiyo
Tubta suuban raacayn
Maxay silac dhibaato leh
Surgooyada la doontaan
Inta Sayidku doortee
Iimaan sугan la siiyay

Si kastoy ahaataba
Ilaa Ciise soo noqon
Runta kama siqaynoo
Xaqa waynu sii hurin

Kuwa seleyayee lumay
Aayadaha sillooniyo
Maqla sawdka aan jirin
Maxay seefo iyo waran
Seedaha ku gooyaan
Inta SaaDir raacdee
Ifka wada siraadshay

Si kastoy ahaataba
Ilaa Ciise soo noqon
Runta kama siqaynoo
Xaqa waynu sii hurin



SAACADI MA LAABNEE

C. A. Axmed

Suubanihii la dhawrayay
Waakan soo socdee iman
Ruux ka seexday mooyee
Kuwa sugaya ee jecel
Sinna uma hungoobaan
Xagga saray ku qaabili


Saacadi ma laabnee
Intaad samada eegtaan
Ciise soo dhawayntii
Safaf dheer u sii gala

Seban gebageboobiyo
Duni socotay weeyaan
Ruuxa daba siqleeyana
Saadir uma yimaadee
Inta aanay kula siqin
Bal seetada u sii daa

Saacadi ma laabnee
Intaad samada eegtaan
Ciise soo dhawayntii
Safaf dheer u sii gala

The logo consists of the letters 'SH' in a bold, black, serif font, centered within a light gray square.

SH



SHAAFICI

Y. B. Xirsi

Shantaa Soomaaliyeed
Sheekhaa ugu wada da' wayn
Caqliga ruuxa loogu shubay

Shaafici sharaftuu lahaa
Intuu shaydaanka xidho
Wanaagyada sheegi jiray

Sharciga Rabbigeena sare
Intuu dhuuxiisa shubo
Injiilkana sheegi jiray

Dadkoon Sheekh badan lahayn
Sharobiyo dawo la hubo
Intuu qalbiyada ku shubo
Ayyu xaqa sheegi jiray


Intuu shirar soo qabtiyo
Intuu dhib u maray sharciga
Shan buug iima qaadayaan

Bulshada sharafteeda sare
Sheekhaa ugu wada da' wayn
Ayyu Shaafici ka yahay

Warkiyo sheekadii Carbeed
Soomaalida shoogga baday
Intuu wada sheegay buu
Xaqii noo wada sharaxay



Tusaaliyo shay la hubo
Sharciga axdiyada ku jiraa
Injiilkuu sheegaybaa
Shaafici sharaf tiisu tahay






DH




SOO DHAWAADA

Y. B. Xirsi

Masiixbaa noo dhintoo
Dhiigiisi daadshee
Dhamaantiin toobadkeenoo
Soo dhawaadaay
Dambiga waa lagu dhintaayoo
Lagu dhacaayee
Dhamaantiin towbad keenoo
Soo dhawaadaay
Xaqnimadaa lagu dhargaayoo
Lagu dhaqmaayee
Dhamaantiin toobadkeenoo
Soo dhawaadaay
Aduunyadu way dhamaanoo
Dheelmad weeyee
Dhamaantiin toobadkeenoo
Soodhawaadaay
Qiyaamihi baa dhawaadoo
Dhammaadki weeyee
Dhamaantiin toobadkeenoo
Soo dhawaadaay
Dhulkiyo cirku way gariiriyoo
Badaa dhammaanee
Dhamaantiin toobadkeenoo
Soo dhawaadaay
Ku dhaqma eraygiisu waa guul
Aan dhammanee
Dhamaantiin towbad keenoo
Soo dhawaadaay





Imaashi baa dhawaadoo
Dhawaaqi weeyee
Dhamaantiin towbad keenoo
Soo dhawaadaay

HALELUUYA WADA DHAHA

C. A. Axmed
.....

Maanta waa dharaartii
Dhalashadii Masiixa
Dhan kastaba adduunyada
Laga soo dhoweeyoo
Mu'miniinta oo dhan
Dheddig iyo laboodba
Dhabtii ciidayaane

Ummad yahay dhammaantiin
Haleluuya wada dhahoo
Dhambaalkiyo salaamaha
Hambalyada is dhaafsada

Maanta waa dharaartii
Beytalaxam dhexdeedii
Lagu dhalay Badbaadshaha
Waana maalin dhool-bari
Dhibicdii u hoortay
Dhulkii oomanaa iyo
Dhibta kuwii la dholondholay




Ummadyahay dhammaantiin
Haleluuya wada dhahoo
Dhambaalkiyo salaamaha
Hambalyada is dhaafsada

Maanta waa dharaartii
Sayidkii la dhawrayay
Dhakhtarkii awooddiyo
Lahaa amar dhammaystiran
Ifka cagaha soo dhigee
Maryan ay dhabteediyo
Dhinaceeda saartay

Ummadyahay dhammaantiin
Haleluuya wada dhahoo
Dhambaalkiyo salaantiyo
Hambalyada is dhaafsada

Maanta waa dharaartii
Xaqu soo dhalaalayoo
Baaddilkuna dhammaaday
Dhallinyariyo waayeel
Noloshii dhinnaydiyo
Runtay dhawrayeen abid
Heleen dhabbihii toosnaa

Ummadyahay dhammaantin
Haleluuya wada dhahoo
Dhambaalkiyo salaamaha
Hambalyada is dhaafsada



U ADKAYSTA DHAAWACA

C. A. Axmed

Sayidkii la dhawrayay
Dhool-bari sidiisii
Dhowaan inuu u muuqan
Ruuxa dhooohan baan garan
Sii dhayalsanaayoo
Dhacadiid u jiifsaday
Waqtigii ma dheeroo
Dharaartuna ma sii foga
Dhammaad weeye duniduye
Isu dhiiba Aabbaha


Dhallaan yahaw la doortow
Dhibaatada adduunkana
Waxba yay idiin dhimin
Dheef baad sugaysaan
U adkaysta dhaawaca

Kay dhimashadiisii
Nolol dhab ah na siisee
Jira dhinaca Aabbaha
Dhaqso buu u soo noqon
Isagoo dhammaystiri
Wixii xukun ahoo dhiman
Ninka dhega lahaw maqal
Dhacdo weeye oo huban
Suurka inuu dhawaaqana
Sii filo dhowaanahan

Dhallaan yahaw la doortow
Dhibaatada adduunkana



Waxba yay idiin dhimin
Dheef baad sugaysaan
U adkaysta dhaawaca







XAYLAA CADDEEYAY

Aweis A. Ali


Soomaalida cuddooni
Curad weeye aan baqin
Cajal laguma tuurtoo
Cidi kuma ciyaartoo
Waalaga cabsoodaa
Xaylaa²⁵ caddeeyoo
Casharkiisi weeyaan

Caamo maanu nihinoo
Cilmiyaannu leenahay
Runta oon caddaynaa
Kama caagi doonnoo
Caalamkaana taa garan
Xaylaa caddeeyoo
Casharkiisi weeyaan

Addis cirifyadeedana
Ciso yaan ku joognaa
Carabaha agtoodana
Way nagu cinaadaan
Cabiid noogu yeeraan
Xaylaa caddeeyoo
Casharkiisi weeyaan

Carabtaas an sheegay
Kama daadin caanoo
Midabkeeney ceebiyo
Cilad yay u haystaan

25 Professor Axmed Cali Xayle (1953-2011) wuxuu ahaa Masiixi, aqoon yahan, nabaddoon, aftahan iyo deeqsi aan agtiisa lagu qadin.



Carab maanu nihinoo
Oromada caanka ah
Caa'ilaanu nahayoo
Caloolaan ka wada nimid
Waa cashiiradeenee
Xaylaa caddeeyoo
Casharkiisi weeyaan

Carab yaan la sheegan
Yaan loo mayrin calalada
Caad nagama saarna
Afrikaan cod kara iyo
Caaqiliin inaan nahay
Xaylaa caddeeyoo
Casharkiisi weeyaan

Cumaan iyo Careebiya
 Cadan iyo Ciraaqba
 Cadalaa ka nolol wacan
 Cigo iyo Ceel-dheer
 Uu kaluunku ceegago
 Xaylaa caddeeyoo
 Casharkiisi weeyaan

Cirooliyo ciyaalba
Cilmi badan yeeshoo
Ciiddiinu waa hodon
Cood intaad u gaysaan



Caawiya dadkiina
Xaylaa caddeeyoo
Casharkiisi weeyaan

Inkastoo colaadiyo
Culays iyo na haystaan
Uu dalkeenu ciiroo
Caalwaa ma aan nihiin
Cilladaanu way hari
Xaylaa caddeeyoo
Casharkiisi weeyaan

CODKA NOLOSHA CUSUBOW

Aweis A. Ali

Codka Noloshu Cusubow²⁶ haddaan
Caadil ka cabsoodo
Ciiseba adigaa i baray
Ciilna iga saaray
Caasimadda Banaadir anoo
Cidla igu hayso
Carabi aanan garanayn anoo
Ciridka taagtaagi
Carrabkaagu cillad malahane
Eebbe war ku caabud
Caqligaa adaan kaa heloo
Kugu ciseeyaaye

26 *Codka Noloshu Cusub* waa idaacad soo jireen ah oo ku baxda afka Soomaaliga; idaacaddu waxay faafisaa Injiilka Sayid Ciise Masiix.



Ciddaan Ciise garanayni waa
Ehel cadaabeede
Injiilkaa caddeeyee ka eeg
Caadil hadalkiisa
Cafis waxaa uun laga helahayaa
Ciisaha an sheegay
Soomaalidaan codkaa garan ayaa
Ciilna igu haysa
Intaan Ciise soo laabanoo
Caalamkan imaanin
Cafiskiisa waa in laga maqlaa
Awdal cirifkeeda

Waqooyiga Galbeedna cod dheer
Caawa ugu sheega
Casharkaaga waa in laga maqlaa
Togdheertaan ciseeyo
Sool iyo Sanaag yaan cidina
Cawadan moogeyne
Barigaa Caluuladu ku taal
Ciiseba u baahan
Mudug yaan Casiis uga baryaa
Inuusan ceebaynin
Nugaal yaan cilmigaad waddo
Cimrigood diideyne


Galguduudda aan caashaqee
Caadil igu beeray
Axdiga Cusub wey rabaan
Ciddaha joogaaye
Culimiyo caamaba u gee
Caynkan an higaadin
Hiiraan cidlada hawga tegin
Caaqilada jooga




In Casiis wadda an loo marayn
Tan Ciise mooyaane
Waa in caadka looga qaado oon
Cidina ceeboobin
Baay iyo Bakool cidaha dega
Caafimaad hele e
Cuurar dhawr ah yeey leeyihiin
Ciise wada raacay
Shabeelooyinka yaan cawada
Ciise u baryaaye
In uu caadilkeen siiyo kuwo
Ciise u adeega
Oo ciidda tira dhaafa oo
Cidna ka cabsoonin
Oo Injiilka cod dheer ugu dhiga
Ciilna ka fogeeya

Codkar yaa Gedo lagu yaqaan
Cimrigood ha raagee
Casharada Masiixoy bartaan
Yaa camari layde
Jubbooyinka cidahaa degee
Caadil ka cabsooda
Cibaada runa waa in ay bartaan
Ciisena adeecaan
Gabayo cusub waa in ay Rabbiga
Toos ugu curshaane
Oo caalamkoo dhami maqlaa
Ciise jacaylkooda

Codka Nolosha Cusubow adoon
Waxba cabsoonaynin
Dheeraa codkaagoo la maqal
Cawiye laylkeede





Caaddilaa Wakiil kuu ahoo
Caynka kuu haya e
Isagaa codkaagaa watoo
Waan la celinayne
Shaydaanka coofka lahibaa waa
Uu ka cararaaye
Casharkaaga yaa laga helaa
Caafimaad dhaba he

JACAYL CIISAAN QABAA

Y. B. Xirsi
.....

Aduunkoo ciirayoo
Dunuubtii wada cuslayd
Ciqaab halis loogu jiro
Masiixbaa caawiyoo
U fidi cafis waara abid
Jacayl Ciisaan qabaa
Caruurtiisaan ahaan
Caleen ku salaamiyoon
Cod sare ku amaanayaa
Dadkii cudurada qabiyo
Kuwii jinku wada cadibay
Culayskoodii qaboo
Masiixbaa caawiyoo
U furay caafimaad la hubo
Jacayl Ciisaan qabaa
Caruurtiisaan ahaan
Caleen ku salaamiyoon
Cod sare ku amaanayaa




Curyaanimo kuwii fadhiyay
Intay cududuhu kugeen
Aheey aan ciil baxayn
Masiix baa caawiyoo
Ku socda cagahoodi yiri
Jacayl Ciisaan qabaa
Caruurtiisaan ahaan
Caleen ku salaamiyoon
Cod sare ku amaanayaa
Carrada maydkii galee
Intuu ciidda hoos ka maray
Cadkiisii wada qudhmeen
Masiixbaa caawiyoo
Mar kale nafta kali u celii
Jacayl Ciisaan qabaa
Caruurtiisaan ahaan
Caleen ku salaamiyoo
Cod sare ku amaanayaa

SIDA CULAYGA OO KALE

C. A. Axmed
.....

Barastiyo cambaartiyo
Carrab hadal karayniyo
Cududaha engegay iyo
Indho wada curyaamay
Ciisow waxaad tahay
Cudurrada dhammaan
Mid ka caynshay dunidoo
Caafimaadshay uunkee





Eraygiyo codkaagana
Sida culayga oo kale
Aan ku cuganno laabtee
Nala joog cawiyo subax
Cishadii la dhalay iyo
Caawadan la joogaba
Cillad kaan lahaynoo
Cirka sare ka yimidow
Maydkii carrada iyo
Lagu aasay ciidana
Nafta kii ku celiyee
Awood culus lahaayow

Eraygiyo codkaagana
Sida culayga oo kale
Aan ku cuganno laabtee
Nala joog cawiyo subax



GUHAAD

Aweis A. Ali

Geeridu xaq weeyee
Intuu uumay Guulana
Nafta geliyay oo idil
Way wada go'aayaan
Goorti ay ahaataba

Anigoona taa garan
Guhaad iyo caloolyow
Gocashaan dareemaa
Gama'ii la ii diid
Gogoshaanba hiifaa

Muu gaboobin Xaylee²⁷
Guxush muuna noqon weli
Mana uu gu' waynayn
Gadh madaw han qaadiyo
Geesi buu ahaayee

Axmed Xaylihii go'ay
Nabaddoonki guushiyo
Gobanimo u dhaladkiyo
Gacanwaynidiisaa
Qalbigayga kaba go'in

Geeridiisi awgeed
Gaawaheenu maranoo
Guunyana ma aan lihin
Afar uu gob ku ahaa
Goobta yaanba soo dhigi

27 Professor Axmed Cali Xayle (1953-2011) wuxuu ahaa Masiixi, aqoon yahan, nabaddoon, aftahan iyo deeqsi aan agtiisa lagu qadin.



Dadkoo gees u kala baxay
Geed fuushay nabadduna
Laysu guran gantaalada
Gowrac laysla maagay
Gardaradu hanqaadday


Isagoon gabbanahayn
Ridahayn gar eexaad
Geeshkiyo gulufkii
Uu qolaba gaarkeed
Garansiiyay nabaddoo


Gabanadi uu dhalay
Gambo kaan u haynin
Gurigiisu maran yahay
Gaaridiisi yaabtay
Gurboodkiisi gaajoon

Gacal iyo danlayba
Axmed Xayle gurigiis
Yaa loo gurtaaye
Wixii Guulle siiyuu
Gacmaha u buuxshaa

Cilmigaan la garanayn
Galti bixin waydoo
Isagaaba garan jiray
Gaamurtay aqoontiis
Jaamacado yuu galay

Cilmi yuu gunaanaday
Tii la garan waayana
Ka caddeeyay giirkee
Aqoontiisa gaarka ah
Waa garasha dheeree





Kaftan aan gef lahayn
Isku riixo gacalku
Googaalaysi gaariyo
Guud caddu bilowdo
Goobtuna camiran tahay

Geeraar aftahaniyo
Guurowga lala dhacay
Gabayadu bilowdaan
Gebagebada isagaa
Guubaabada lahaayee

Maantase galbadayoo
Geeridu xaq weeye
Nebiyadi horuu go'ay
Yuu gogol la joogaa
Guullaha agtiisee

Ummadduu gargaarkiyo
Garabkuu ahaana
Geyigooda nabad sii
Gees mari colaadaha
Goor iyo ayaanba

AXMED XAYLE GEERIDA KU TIMID

Aweis A. Ali

Axmed Xayle²⁸ geerida ku timid
Ee galbisay maanta
Geyigeena waxay uba ahayd
Guuldariyo hooge

28 Professor Axmed Cali Xayle (1953-2011) wuxuu ahaa Masiixi, aqoon yahan, nabaddoon, aftahan iyo deeqsi aan agtiisa lagu qadin.




Nabadoon gar gala buu ahaa
Geesi gacan wayne
Agoon gaawa maran baynu nahay
Ginina aan haysan
Afar uu gob ku ahaa balaan
Goobta ka caddeeyo

Dadkoo gees u kala boodayoo
Nabadu geed fuushay
Hubkoo laysu guranahayoo
Gawrac laysla maagay
Garaad iyo islaan iyo malaaq
Midiba gees raacay
Isagoon gabanahayn haddana
Ridayn gartii eexo
Geeshkii gulufka u fadhiyay
Qoloba gaarkeeda
Garansiyyay inay kala galbadaan
Nabadu waa guul e

Nin ragoo gabanno uu dhalay
Uu gambo u waayay
Gurigiisu uu maran yahoo
Gaaridii ay yaabtay
Gurbood aan wax garano aqoon
Gaajo lagu seexo
Axmed xayle yaa loo guda
Guriga kiisahe
Wixii guule siiyay buu yira
Buuxso gacantaada

Cilmi kii la garan waayo oo
Galti bixin waydo





Isagaa loo gayn jiray xaajadii
Garasho loo waayo
Jaamacado nin galay buu ahaa
Oo gunaanadaye
Masaladi la garan waayay buu
Gaanka ka cadayne
Aqoon gaamurtay buu lahaa
Garasho dheeruhuye

Kaftan aan gedaafe lahayn
Gogosha uu joogo
Googaalaysi iyo sheeko ay
Guud caddu bilowdo
Gebi aftahan intii isu fishaa
Goobta wax ka sheegto
Guurow iyo wixii gabay halkaa
Geeraar laga sheego
Gebagebada isagaa lahaa
Guubaabiyo sheeko

Maantase haddii uu galbaday
Waa xaq geeriduye
Nebiyadii eebbahen ee go'uu
Gogol la joogaaye
Inna sida gobti yaan u caban
Guulaha awoodda le
Ummadduu gargaarka u aha
Yaa guhaad badane
Geyigooda nabad uga yeel
Goor iyo ayaanba




GAALLIN INAY TAHAY SHABAAB


Maxamed Gurxan

Geeridu waa lama huraan
Gadaafaha kalaa ka daran
Waxaan gayigeenna horay
Iyo gadaalba loo arkayn
Gadaf iyo xurmadii xaqay
Gabood dhigeen gawaan
Dad miyaa la gooriyaa
Sidii xoolaha la gawracaa?
Madaxii laga gooyay iyo
Goroda gaalliso loo sudhaa

Gaallin inay tahay Shabaab
Gob aysan marnaba ahayn
Falaadkoodaa laga gartaa
Gaboodahay bulshada ka gali
Gabadh aan wax gaysan iyo
Raggay xaqdarada god-dhabi

Maatada miyaa loo ganaa
Nabsi miyaa laga gurtaa
Godob aan abidkeed hadhayn
Gacalka miyaa laga gala
Xaqa miyaa laga gudaa
Anaa manta kaa golweyn
Miyaa la isugu goodiyaa
Ruuxaan guluf kugula jirin
Miskiin ku gabani gacmaha
Miyaa loo gaystaa guhaad





Gaallin inay tahay shabaab
Gob aysan marnaba ahayn
Falaadkoodaa laga gartaa
Gaboodahay bulshada ka gali
Gabadh aan wax gaysan iyo
Raggay, xaqdarada god-dhabi

Gayigay soomaalidu lahayd
Kuwan baday guul-darada
Garacda yaa dhalay Shabaab
Xaggay naga soo galeen
Galgaal iyo gollidan baas
Golxob iyo gudmaha watee
Ku gawriir saday dalkii
Ka dhigay beelihii galgalin
Guraca iyo gumaadka wada
Cidday ka garqaadan jirin

Gaallin inay tahay Shabaab
Gob aysan marnaba ahayn
Falaadkoodaa laga gartaa
Gaboodahay bulshada ka gali
Gabadh aan wax gaysan iyo
Raggay xaqdarada god-dhabi

Mansuur²⁹ ragga madax guray
Waldiire³⁰ gumaca ku gubay
Ku garaacay Daa'uud³¹ rasaas
Gablan ka dhigay geesiyaal
U gartay gabanno agoon

29 Mansuur Maxamed (1983-2008) wuxu ahaa Masiixi iyo samafale.

30 Cabdiraxmaan Xaaji Axmed (Waldiire) wuxuu ahaa Muslim iyo nabaddoon waxaana la dilay 2009. Waldiire wuxuu ka mid ahaa siyaasiyiinta magaca ku lahaa gobolka Jubada Hoose.

31 Professor Daa'uud Xasan Cali (1944-2008) wuxuu ahaa Masiixi, aqoon yahan iyo wadani.




Haween gaariyadii u dhaxay
Inay ciil la gawriirsadaan
Gasariir aan garaw lahayn
Gabxo waxay qoys dhigeen
Ama gabawar reero badeen

Gaallin inay tahay Shabaab
Gob aysan marnaba ahayn
Falaadkoodaa laga gartaa
Gaboodahay bulshada ka gali
Gabadh aan wax gaysan iyo
Raggay xaqdarada god-dhabi

Kuwaas gaaridana ku dilay
Intay gulaammo kufsadeen
Gabantu way galmootay yidhi
God dheer u geeyay garbaha
Goonyaha kala maray dhadhaab
Kaga gooyay naftana halgaad
Garsoor hadduu jiro cadliya
Kuwii la yidhi u gude
Maxaan goobta looga helin
Gartaa waa in dib loo naqaa

Gaallin inay tahay Shabaab
Gob aysan marnaba ahayn
Falaadkoodaa laga gartaa
Gaboodahay bulshada ka gali
Gabadh aan wax gaysan iyo
Raggay xaqdarada god-dhabi

Iyagoo goodigooda faan
Garmaamaha dhulkii gadiyay





Ganbiga markii la galay
Guutadu ka timid galbeed
Xamar goonyaheeda la degay
Shabaab soo kuwii gabaday
Qoryaha muska ay gasheen
Iyagoo luli laba gacmood
Intay dumarka dhex galeen
Kuwii guryaha isku xidhay

Gaallin inay tahay Shabaab
Gob aysan marnaba ahayn
Falaadkoodaa laga gartaa
Gaboodahay bulshada ka gali
Gabadh aan wax gaysan iyo
Raggay xaqdarada god-dhabi

Raggu ganbay xidhan yihiin
Waxay soo gashani khamiis
Gadhkii oon la xiiri karin
Waa inay shaarubada guraan
Surwaalkuna u gaaban yahay
Teendhay dumarkii u galin
Sidii aqal guura hayay
La ekaan labadaa gidaar
Wajiga waa inay gedfaan
Sidii aan cidiba u garan

Gaallin inay tahay Shabaab
Gob aysan marnaba ahayn
Falaadkoodaa laga gartaa
Gaboodahay bulshada ka gali
Gabadh aan wax gaysan iyo
Raggay xaqdarada god-dhabi





Ma laha guurti sugan
Dhammaan waa godadlayaal
Waa niman garroomid badan
Gudoodi naagaha u guda
Goobaare haddana gaadaa
Gabbaray dadkii ka guri
Gasiinna wax uma gadaan
Intaa waxay raadin garab
Hunguri way la gaylamaan
Gadaalna wax uma dhigtaan

Gaallin inay tahay Shabaab
Gob aysan marnaba ahayn
Falaadkoodaa laga gartaa
Gaboodahay bulshada ka gali
Gabadh aan wax gaysan iyo
Raggay xaqdarada god-dhabi

Ciil baa aniga i gubi
Cadhaan la gadoodi dhaax
Inaan goosto aar sidii
Markii laabta aan gashana
Xeer baa ii cesha gadaal
Eraygii Sayidkaan gocdaa
Wuxuu guuluhu na faray
Haddii lagaa galo xumaan
In aadan gaafaysi galin
Gacanta ay gartaadu noqon

Gaallin inay tahay shabaab
Gob aysan marnaba ahayn
Falaadkoodaa laga gartaa
Gaboodahay bulshada ka gali





Gabadh aan wax gaysan iyo
Raggay xaqdarada god-dhabi

Galin ma seexdo habeen
Gama'na ma lado hurdada
Gabood nimanka wax falay
Gulufka ay nagu wadaan
Geeddanka aan wax tarin
Gunburi weeye ee galgalin
Gaddeedii anoon ku celin
Garwaan kii ay galeen
Gibilka loo sudhin gartaa
Gabalku ugu dhicin gawriir
Gaallin inay tahay shabaab
Gob aysan marnaba ahayn
Falaadkoodaa laga gartaa
Gaboodahay bulshada ka gali
Gabadh aan wax gaysan iyo
Raggay xaqdarada god-dhabi

GACMAHAAGA NOO FIDI

C. A. Axmed
.....

Dembigaan gelayniyo
Waxaan gaysannoo idil
Giddi waan ka bayrnnoo
Xaqii baannu garannaye



Guulow Allahayow
Goor iyo ayaanba
Gacmahaaga noo fidi

Golihii iblayskiyo
Gudcurkii inaannaan
Ugu noqon gadaal buu
Naga yahay go'aanke


Guulow Allahayow
Goor iyo ayaanba
Gacmahaaga noo fidi

Nimcadaada guudiyo
Kuwaan garan Injiilkee
Inuu Eraygu gaaraan
U gallaa socdaalkee

Guulow Allahayow
Goor iyo ayaanba
Gacmahaaga noo fidi

Gabbalkii dhacaayiyo
Waagii soo guduutaba
Noogu deeq gargaarkiyo
Raxmaddaada gaarka ah

Guulow Allahayow
Goor iyo ayaanba
Gacmahaaga noo fidi







FAAFIYA INJIILKA

Paul Faarax Khalif & Aweis A. Ali

Falimaha Rasuulladaa
Furay dhegahaygoo
Ka fogaaday shaydaan
Ka fogaaday shaydaan

Faadumiyo Maxamadow
Maqla faaladaydoo
Faafiya Injiilka
Faafiya Injiilka

Ninka ka fiiga Sayidkaan
Faa'iida lahaynee
Wuxuu filayo waa hoog
Wuxuu filayo waa hoog

Faduul kuma hadlaayoo
War u firso maansadan
Yaan ibliis ku foofsane
Yaan ibliis ku foofsane

Ninkaan fool adkayni
Fulay weeye hoogee
Ha ku lumin fooraha
Ha ku lumin fooraha

Masiixenna ficani
Faral weeye raaciis
Foolxumida reebbee
Foolxumida reebbee





Falanqee warkaygoo
Falaaraha shaydaanku
Difaac kaaga filan yahay
Difaac kaaga filan yahay

Fanka iyo suugaan
Fariimaha ku sheegoo
Farac kasta ha gaadhee
Farac kasta ha gaadhee

Iftiin faraxa weeye
Waxaan idin faraayaa
Faseex inaad u sheegtaan
Faseex inaad u sheegtaan

Ka fogaada fashiloo
Ka firxada xumaantoo
Xaqa fidiya haatan
Xaqa fidiya haatan

Fitna lama jeclaystoo
Xaqa lagama fiigee
Masiixaa innagu filan
Masiixaa innagu filan

Anoo Faafan joogo
Faraskayga saaran
Ley fasir Injiilkii
Ley fasir Injiilkii



QAADIROW ILAAH

Y. B. Xirsi

Qaadiroow ilaah
Quwadaada badan
La qiyaasi karin
Qalad aan lahayn
Qalbi aaminoo
Kuu qushuuc sanoo
Dadki quudhsadeen
Yaa qayshadee
Ruux Quduus ahow
Qaadir Aabbahay
Qaxar qaylo badan
Quud soo maraan
Kaaga qayshannee
Qaniyoow Ilaah
Qasnadaha camiran
Aan qabaw sannee
Dabool nooga qaad
Wabiyada qulqula
Bado wada qadhaadh
Quruumaha ku nool
Qaab kastaba naflay
Ma qaddoo giraam
Rabbigeed u qoray
Yay quudataa
Innaguna qorshaha
Rabbi noo qaradhay
Qurus waxaan cunnaa
Qaybtaan lahayn
Kibirkiyo qabkii
Nafta qiijin jiray




Rabbi naga kor qaad
Waan qabawsanoon
Qoys reer Masiix
La qaxwaynayaa
Hooyo qaaliyeey
Aad qadawsatide
Hadyad Ruux Quduus
Kaalay qaybsannee


QIYAAMUHU WUU DHOW YAHAY

C. A. Axmed
.....

Khilaafka duulkaa wadee
Kutubtii hore qorrayd
Intay wada quursadeen
Qallooca ka doortayoo
Haddana isla sii qabwayn
Qorniinka miyaanay arag
Qoraalkana weli ka baran
Inuu qaaddirkeenna wayn
Injiilkaba ku soo khatimay
Farriimihii loo qorsheeyee
Dunidu wax ku qaadan layd

Qiyaamuhu wuu dhow yahay
Qofkaan oggolayn Masiixaa
Nimciyo khayr laga fogeeyoo
Khasaariyo hoog ku sugan





Qoomkaa lumayee iblays
Qaraabiyo ehel ka yeeshay
Haddana ku khasbaaya uunkii
Inaan qalbigiyo afkaba
Marnaba laga qiran Rabbiga
Miyaanay xaqii la qeexay
Qawlkii Eebbahay fahmayn
Qudduuskaa sare ku maqan
Inuu yahay Qaaddirkeen
Jir aadane qaatayoo
Dunida qaabkaa ku yimid

Qiyaamuhu wuu dhow yahay
Qofkaan oggolayn Masiixaa
Nimciyo khayr laga fogeeyoo
Khasaariyo hoog ku sugan

ALLOW INTA AAN QABRIGA

C. A. Axmed
.....

Rabbow inaad tahay qudduus
Xumaan iyo khalad lahayn
Haddana tahay Qaaddirkii
Koonkoon weli qaab lahayn
Qallooc li'i taagayoo
Aadmiga uga dhigay khaliif
Ayaan qirayaa anigu

Qaar baanse ogayn middaa
Qar iyo buur dheer ka lusha



Allow inta aan qabriga
Iyaga loo qaadin weli
Qalbiga uga saar naxliga


Rabbow adigaa khalqiga
Si qumman u abuurayoo
Awood aan qiyaas lahayn
Cidina kula qaybsanayn
Adoo qurah baa iska leh
Oo taa hadal kama qotomo
Iyo qiil lagu dafiro

Dad baase qalqiil ku jira
Qiyaamaba aan la socon
Allow inta aan qabriga
Iyaga loo qaadin weli
Qalbiga uga saar naxliga

NAGA QABO IBLAYSKA

C. A. Axmed
.....

Dadka qaar waxaa jira
Qaadan waa Injiilkoo
Marka kastoy Qorniinkiyo
Maqlaan qawlka Eebbe
Intaa quursanaayoo
Qiimaynin weligood
Oo jidad qalloocani
Ku qanciya naftoodoo
Khuraafaadka aaminay





Qaaddirow Allahayow
Qarnigani shar weeyee
Kuwa khayrka necebiyo
Naga qabo iblayskaba

Qolyahaa cadaabtiyo
Qayb u yeeshay naartana
Waa kuwo khasaaray
Waana duul quluubtiyo
Laabtoodu qalashayoo
Marnaba qaadan waanada
Maalintaa qiyaamase
Qiil ma laha ruuxuu
Sayid Ciise qaabilin

Qaaddirow Allahayow
Qarnigani shar weeyee
Kuwa khayrka necebiyo
Naga qabo iblayskaba

Qummanow Masiixii
Sababtuu u qubay dhiig
Qasdigii laga lahaa
Inay tahay quruumaha
Qaabkii dunuubtiyo
Looga qaaday eedaha
Qoom baa dafirayoo
Qorshihii badbaadada
U khushuucin abidkood

Qaaddirow Allahayow
Qarnigani shar weeyee
Kuwa khayrka necebiyo
Naga qabo iblayskaba



MASIIXII MAANKU RAACAY

Y. B. Xirsi

Masiixoow maanka deeqoow

Madi Ilaahoow

Aduu maankii ku racee

Noo miciineey

Adaa mugdigii caddeeyoo

Maalin keenee

Masiixoow maanku raacyoow

Noo miciineey

Adaa mulkigoo dhan yeeshoo

Maanta joogee

Masiixoow maanku raacyoow

Noo miciineey

Adaa lagu musbaaroo

Lagu mudaayee

Masiixoow maanku raacyoow

Noo miciineey

Adaa webi lagu muquurshoo

Kasoo mudh yidhiyee

Masiixoow maanku raacyoow

Noo miciineey

Adaa nafta maydka siiyoo

Barasta maaydhee

Masiixoow maanku raacyoow

Noo miciineey

Adaa dambigayga maydhoon

Mahad ku siinee

Masiixoow maanku raacyoow

Noo miciineey

Adaa masalooyin keenoo




Wada macneeyee
Masiixoow maanku raacyoow
Noo miciineey
Adaa samadaa mushaaxoo
Kalii maleegtee
Masiixoow maanku raacyoow
Noo miciineey
Adaa midigtiisa joogoon
Lagu murmaynee
Masiixoow maanku raacyoow
Noo miciineey


MAHADDA SIIYA

Y. B. Xirsi
.....

Maankii rumeeya
Masiixa raaca
Mugdiga dhaafyoo
Ma waayo raaxo

Ciisoow Masiixa
Muxubadiisaa
Dambiga maydhee
Mahadda siiya
Matakan Eebbee
Maryan la siiyay
Muftaaxi weeyee
Mahadda siiya
Cuuryaan maroora





Arag mid waayay
Masiix daweeay
Mahadda siiya

Ciisoow masiixa
Naf siiyay maydka
Barasta maydhay
Mahadda siiya

Maraadadeena
Miridh ku keene
Masiixa weeyee
Mahadda siiya
Malab da'aaya
Midho bislaaday
Masiixu weeyee
Mahadda siiya
Karoos musbaaran
Markii la saaray
Murug xasuustoo
Mahadda siiya

MAALINTA ADAGEE XISAABTA

C. A. Axmed
.....

Maryama Sayidkay dhashow
Masiixii Ilaahay doortow
Runtii kii noo miciinee
Nimcoo idil nagu mannaystow




Annana kaa maarmimaynee
Mar uun midigtaada noo dhiib
Maalinta adagee xisaabtana
Sayidow kuwaad meelahaa sare
Ugu gaynayso Mawloo
La wada maamuuso naga yeel

Maryama Sayidkow dhashow
Masiixii Ilaahay doortow
Madawgiyo gudcurkii baasiyo
Mugdiga kii naga kaxeeyow
Magaciisa kaan naxariistiyo
Ku mutaysannay badbaado

Maalinta adagee xisaabtana
Sayidow kuwaad meelahaa sare
Ugu gaynayso Mawloo
La wada maamuuso naga yeel

Maryama Sayidkow dhashow
Madigii Ilaahay bixiyow
Kii uu maankeennu raacee
Dembiga dunidoo dhan mayrow
Haddana mucjisooyinkiisiyo
Dhammaan amarkiisu muuqadow

Maalinta adagee xisaabtana
Sayidow kuwaad meelahaa sare
Ugu gaynayso Mawloo
La wada maamuuso naga yeel



MASIIXIYADDA SOO RAAC

C. A. Axmed

Kuwo jecel Masiixoo
Muddo hore naftoodii
Lagu mayray dhiigoo
Murugoonin baan nahay
Maalin iyo habeenkeed
Kuwa maqlay Injiilkoo
Nimcadiisa moog baan
U micneeya leennahay

Ee midkaagan naca qaba
Xaqa muranka geliyow
Mar uun aad badbaaddide
Intaan mawdku kula tegin
Masiixiyadda soo raac

Kuwo Rabbi miciinsada
Mawle isku halleeyoo
Waxaan nahay mugdigii baas
Dib u milicsanayn abid
Kuwa marin habaabee
Magansaday iblayskaan
Injiilkay ka maageen
U muujiya is leennahay

Ee midkaagan naca qaba
Xaqa muranka geliyow
Mar uun aad badbaaddide
Intaan mawdku kula tegin
Masiixiyadda soo raac



MURTIDA WAXAN UGA SOCDA


C. A. Axmed

Hadduu dhoothane mar qurah
Injiil micnahiisu garan lahaa
Nimcaduu ku mannaystay Eebbe
Maankoodu dareemi lahaa
Dadkuba qaar may lumeen
Mugdina kuma sii jireen
Weliba inta ay murmaan
Masiixa kama ay ordeen

Murtida waxan uga socdaa
Inay kuwa moog gartaan
Inuu yahay Ciise marinkii
Mawlaha loo sii maraayoo
Marnaba aan lagu hungoobayn

Hadduu qof kastaba magaca
Masiixa rumaysan lahaa
Weliba maskaxdiyo qalbiga
Si mudan uga qiran lahaa
Dad badan intay magangalaan
Iblays ma bideen miciin
Ciisihii dembigooda mayriyo
Runtaba may baal mareen

Murtida waxan uga socdaa
Inay kuwa moog gartaan
Inuu yahay Ciise marinkii
Mawlaha loo sii maraayoo
Marnaba aan lagu hungoobayn



MAHADDANA WAXAA LEH

C. A. Axmed

Dardaarankii Masiixu
Ma ogtahay inuu yahay
Midnimada dhexdiinna ah
Mar kastaba adkeeyoo
Sida kuwo mataano ah
Muran li'i ku wadajira

Mid kastaba walaalkii
Inuu midigta haystoo
Laysu wada miciino
Mabda'eennu weeyaan


Mahaddana waxaa leh
Madigii Ilaahay
Injiilkii macaanaa
Sida malabka oo kale
Muudsada inagu yiri

Murti baan ka dhaxallay
Markuu Sayidku nagu yiri
Meel kastoo aad joogtaan
Magacayga awgii
Mid kastoo idiin neceb
U muujiya jacayl wayn

Maalka dunida yaallana
Inaynaan u murugoon
Waa waxaynu maankiyo
Maskaxdaba ku haynee



Mahaddana waxaa leh
Madigii Ilaahay
Injiilkii macaanaa
Sida malabka oo kale
Muudsada inagu yiri







WAADIGA KHAYRKA

C. A. Axmed

Iblays warkiisiyo
Waxyeeladiisaba
Magaca Wiilkaan
Ku waabinaynaa

Waynow na caawi
Waddada toosan
Yaannan ka weecan


Inaan wareegnoo
Waddamadoo dhan
Wanaag u sheegnoo
Wacdinno weeyaan

Waynow na caawi
Waddada toosan
Yaannan ka weecan

Markaan walaacno
Talo wareertaba
Masiixa weeyaan
Kaan weheshanayno

Waynow na caawi
Waddada toosan
Yaannan ka weecan

Waqal sidiisoo
Waray xareeddii



Naga waraabi
Waadiga ruuxa

Waynow na caawi
Waddada toosan
Yaannan ka weecan

XERTII MASIIXA

C. A. Axmed

Anigu walbahaari maayoo
Naftaydu walaaci maysoo
Illayn Waaxidkii i uumaa
Dhabtii ii weheli rumaad ah

Dhammaan waaxyaha adduunka
Inaan ku wacdiyo Injiilkaa
Ayaan weligay u taagnoo
Xertii waxaan ahay Masiixa


Wagtiga adagee la joogana
Waxyeello hadday i gaartana
Anigu waxba uma arkaayee
Rajada Eebbaa igala wayn

Anigu weec weecan maayo
Xaqana waydaaran maayo
Waayo Rabbigii i doortaa
Aniga war la hubo i siiyay



Shar wade aawadii marnaba
Anigu uga waaban maayo
Inaan guto waajibkaygoo
Injiilka u naadsho weer weer

Wagtiga adagee la joogana
Waxyeello hadday i gaartana
Anigu waxba uma arkaayee
Rajada Eebbaa igala wayn







NA HOGGAAMI EEBBOW

C. A. Axmed

Na hoggaami Eebbow
Yaanaan hallaabine
Hilinkaaga toosan
Nagu hagaaji Eebbow

Gacmahaan hadiyo jeer
Kuu hoorsannaayee
Na hanuuni Eebbeow


Na hoggaami Eebbow
Yaanaan hareertiyo
Horay iyo gadaalba
Ku hungoobin Eebbow


Hawlahaagii baan abid
Heegan aan u nahaye
Na hanuuni Eebbow

Na hoggaami Eebbow
Yaanaan habaabine
Iblaysyada hagoonata
Nooga hiilli Eebbow

Naftan kuu hanwayn baan
Kuu soo hibaynaa
Na hanuuni eebbow

Na hoggaami Eebbow
Hilbahayaga naartiyo





Jahannamo holcaysa
Ha ku hoojin Eebbow

Habeen iyo dharaarba
Adaan kuu hilownaa
Na hanuuni Eebbow

HALELUUYAH

C. A. Axmed

Ruuxa hela nimcada
Ma harraado weligii
Halkay nolosha taaliyo
Jidka kama hallaaboo
Rabbigaa hoggaanshoo
Ku hagaaya nuurkee
Waa hibo rabbaani ah
Kol hadduu Masiixii
Noo huray naftiisii
Na hareero joogo
Haleluuya leennahay

Rabbi kuu hanuunshee
Hilinkiisii raacay
Xaqa kama habaaboo
Wuxuu hiigsanaayaa
Ballanqaad la hubo iyo
Rajaan lagu hungoobayn
Waa haybad iyo sharaf
Mar haddaan xorownay



Sharcigaba ku hoos jirin
Oo aan had iyo jeer
Haleluuyah leennahay

HILINKII NOLOSHA

C. A. Axmed

Haddaad Ciise jeceshahay
Hubantiyo dhab kaa tahay
Runta lama hagoogee
Ku hor qiro dadkoo idil

Ha ka baqanin aadmiga
Ee u sheeg hadiyo jeer
Inuu lama huraan yahay
Iyo hilinkii nolosho
Loo qabo hamuun wayn

Ciise kaan ku hiranayn
Oo aan isku hallaynayn
Hoog iyo balaayiyo
Halis buu ku sugan yahay

Rabbigaa ku hagayoo
Kuu qaban hoggaanka
Haddaad amarradiisii
Habsami u dhawrto

Kuwuu hoday iblayskiyo
Habaarqabe ha raacinoo





Xaqa ha ka habaabinee
Hoygay noloshu taalliyo
Hiigso ballantii Eebbe

Ciise kaan ku hiranayn
Oo aan isku hallaynayn
Hoog iyo balaayiyo
Halis buu ku sugan yahay



GUNAANAD

Waan ku faraxsanahay in buuggan la yiraahdo *Maansada Masiixa* uu ku soo dhacay gacantaada oo aad nasiib u yeelatay dhuuxitaanka murtida ku miisan. Wakhti badan ayaa loo huray oo dadaal badanna waa ku baxay sidii buugganni kuu soo gaari lahaa. Fadlan buuggan la wadaag dadka xiisaynaya si ay uga faa'iidaystaan. Fadlan e-mail innoo soo dir haddii aad tahay Masiixi doonayaa agab kale oo kaa caawiya ku koritaanka iimaanka ama haddii aad tahay qof doonaya in uu iminka Sayid Ciise Masiix iyo Kitaabkiisa Injiilka wax ka barto. Waxaan kuu ballan qaadaynaa taageero wayn oo ku saabsan sidii aad ku heli lahayd Kitaabka Quduuska Ah iyo weliba kutub kale oo kugu caawinaya barashada Kitaabka Quduuska Ah iyo caqiidada Sayid Ciise Masiix.

Haddii aad si gooniya u danayso maansadan waxaad dalban kartaa buugaagta kale ee kan daba yaal. Waxaan rejo wayn ka qabnaa in suugaantan si cod ahaan ah loo duubo mustaqbalka si maqal ahaan looga faa'iidaysto. Waan soo dhawynaynaa wixii talo iyo tusaale ah ee aad noo soo jeedisoo innaga oo ku faraxsan.

Waxaan u ducaynaynaa dhammaan akhristayaasha buuggan qiimaha iyo qaayaha badan ee rumaysan Sayid Ciise Masiix in Eebbe ku negeeyo caqiidada suubban ee Sayid Ciise Masiix si aysan u ceeboobin maalinta qiyaamaha. Waxaa kale oo aan u ducaynaynaa akhristayaasha buuggan ee aan weli rumaysan Sayid Ciise Masiix in Eebbe xaq ku hoggaamiyo kana soo guuraan gudcurka iyaga oo soo degaya iftiinka. Waxaan idinkaga tegayaa, “Nimcada Rabbi Ciise Masiix iyo jacaylka Ilaah iyo wehelnimada Ruuxa Quduuska ahu kulligiin ha idinla jireen.” 2 Korintos 13:14

Guul iyo Gobanimo

Aweis A. Ali



ABOUT THE SERIES EDITOR

Rev. Aweis A. Ali (BTh., MDiv., PhD - candidate) is a missiologist and a student of the history of the Somali Church. Aweis is a former house-church pastor, worship leader and evangelist; he has been in ministry since 1993. Aweis currently oversees the work of his denomination in the Horn of Africa.



Maandeeq Publishing

ISBN: 978-9914-700-43-5



9 789914 700435